



Tusmada Kireystaha

416-981-5500 | torontohousing.ca

Toronto
Community
Housing



Mawduucyada

Kusoo dhawoow guriga	5
Shaqaalaheena iyo sida aan kuugu adeegno	6
Sida loola xiriiro Toronto Community Housing	12
Shaqaalaha deegaankaaga	15
Waajibaadkaaga ka kireyste ahaan	16
Xuquuqda iyo waajibaadka Toronto Community Housing	18
Masuuliyada adeegga ee Toronto Community Housing	20
Barnaamijka helitaanka ee TCHC.....	21
Wax ka badelka guriga	21
Isbadellada aagaga guud	23
Waa maxay R-PATH?	23
Hawsha aqoonsiga iskaa ah ee badqabka xaaladaha degdega ah	24
Codso qaab kale.....	24
Taageero dheeri ah	24
Hawsha cabashada ee Toronto Community Housing	25
Soo sheegista khiyaannada iyo khasaarada	26
Soo degista	28
Guurista	29
Gurigaaga: xogta nolol guul leh	30
Gelitaanka gurigaaga.....	30
Caawimaada la heli karo	31
Mukeyfyada	31
Kormeerada guriga ee sanad kasta	32
Qalabka korontada	32
Balakoonnada	33
Qashinka, wasaqda dhirta iyo dib u warshadeynta.....	33
Kulaylka.....	36

Caymiska	36
Fureyaasha iyo silisyada furaha.....	37
Xakamaynta cayayaanka.....	38
Xayawaannada rabaayada ah	39
Taleefanka, fiilada iyo interneedka.....	40
Dayactirada iyo ilaalinta	41
Saxuunta sataleydka	42
Sigaar ku cabida gurigaaga	42
Adeegyada guriga	42
Aagaga guud.....	43
Lama ogola in sigaar lagu cabo aagaga guud ama meelaha u dhow dhismahaaga.....	43
Waxyaabaha carfoon.....	43
Qolalka dhar dhaqaalka	44
Goobta aan la daganayn	44
Meelaa la maro.....	44
Goobaha banaanka	45
Dhinacyada banaan.....	46
Barkadaha banaanka ee baashaalka iyo dabaasha	46
Goobaha baakinka	46
Kiradaada.....	48
Noocyada kirada.....	48
Dookhyada Lacag bixinta	49
Warbixinta isbadellada ku dhaca gurigaaga ama dakhliga	51
Dib u eegista kirada ee sanadlaha ah	53
Sida loo codsado u wareegista guri kale	53
Xeerka martida iyo booqdaha	54

Ka maqnaanshaha 90 Maalmood ama ka badan gurigaaga adoo bixinaaya kirada dakhliga ku saleysan	54
Shaacinta xogta shaqsiga ah	55
Guri ka saarida	56
Badqabkaaga	59
Ka qaybgalka bulshadaada	59
Nidaamka Wada shaqaynta Kireystaha	59
Kulannada	59
Boorarka qodobada	60
Webseedkeena	60
Adeegyada iyo taageerooyinka	61
Lambarada muhiimka ah	61
Lambarada badqabka ee ay tahay inaad haysato	63
Taageerooyinka masiibada	64
Xiriirada dhalinta	65
Liiska erayada	67

Kusoo dhawoow guriga

Toronto Community Housing Corporation (TCHC) waxay guryo siisaa ku dhawaad 41,000 qoys oo ku nool magaalladeena oo dhan. Waxaan ka shaqeynayaa inaan bixino guryo nadiif ah, badqab leh, dhawrsan, oo qiimo jaban. Waxaan la shaqeynaa iskaashato badan si aan ugu xirno kireysteyaasheena adeegyada iyo taageerooyinka. Waxaan kala shaqeynaa kireysteyaasha inaan bulshadeena ka dhigno meel ku wanaagsan nolosha.

Kani waa tasmadaada ku aadan ku noolaanshaha guriga Toronto Community Housing (guri dabaq ku yaala ama guri fillo ah). Tasmadu waxay qeexaysaa waajibaadkeena anagoo ah mulkiileyaasha gurigaaga waxayna sharxaysaa xuquuqdaada iyo waajibaadkaaga ka kireyste ahaan. Sidoo kale waxaa ku jira liiska erayada guud ee liiska erayada oo ku qoran **bogga 67**.

Muhiim: Tasmada Kireystaha waxaa loogu talo galay inay noqoto il aad xog degdeg ah ka hesho. Xogta ku qoran tasmadaan ayaa isbadeli karta muddo kadib ama noqon karta mid wakhtigeedii dhacay. Xogta ku qoran tasmadaan waa inaan loo qaadan tallo sharci ahaan. Haddii ay iska hor imaadaan waxa ku qoran tasmadaan iyo sharciga Canada, ama xeer kasta oo ay leedahay Toronto Community Housing, habraac ama tilmaan, markaas sharciga, xeerka, habraaca ama tilmaanta ayaa la raacayaa. Ma jiro wax ku qoran tasmadaan oo ah balan qaad, aqbalaad ama yabooha ay bixinayso Toronto Community Housing.

Fadlan hoos ku qor magacaaga iyo ciwaankaaga si loosoo celiyo tasmadaada haddii ay kaa lunto.

Haddii tasmadaan la helo, fadlan ku celi:

Magaca _____

Ciwaanka _____

Shaqaalaheena iyo sida aan kuugu adeegno

Toronto Community Housing waxay leedahay ku dhawaan 2,000 oo shaqaale ah kuwaasoo ka shaqeeya inay ku siiyaan adeegyo iyo xogta aad u baahan ee ku aadan dayactirada, ruqsadaada, adeegyada maxaliga ah, taageerada iyo badqabka, iyo xogo kale.

Xarunta Adeegga Macaamiisha

Wac **416-981-5500** (24 saac)

limeelka help@torontohousing.ca (haddii aan xaalkaagu ahayn mid degdeg ah).

Xarunta Adeegga Macaamiisha ayaa markasta furan, 24 saac maalintii, 365 maalmood sanadkii. Halkaan ayaad ka helaysaa qaar kamid ah waxyaabaha aad kala xiriiri karto Xarunta Adeegga Macaamiisha:

- Inaad noo sheegto in gurigaagu dayactir u baahan yahay. (**Ogoow:** haddii ay tahay dayactir degdeg ah, markasta wac, ha soo dirin iimeel.)
- Aad wax nooga waydiiso dayactir aad codsatay.
- Aad u gudbiso cabasho.
- Aad u hesho xogta baakinka.
- Aad wax nooga waydiiso waraaq aad naga heshay.
- Aad wax nooga waydiiso heshiiskaaga kirada, ijaarka, ama baaqiga koontada.
- Si aad wax nooga waydiiso munaasabadaha bulshada ama dayactirka wayn ee bulshadaada.
- Aad hesho xogo ku saabsan carqaladaha adeegga (sida koronto la'aanta, dab la'aanta, ama biyo kulul la'aanta).

Xaqiiji inaad lambar tixraac u lahaato codsi kasta oo aad soo dirto.

Adeegso lambarkaaga tixraaca si aad dabagal ugu samayso codsigaaga

Marka aad wacdo Xarunta Adeegga Macaamiisha, shaqaalaha ayaa ku siin doona lambar tixraac ah. Haddii aysan ku siin lambarka tixraaca, ka codso lambar. Waxaad adeegsan kartaa lambarkaan marka aad la hadasho shaqaalaha TCHC codsigaaga.

Xarumaha Adeegga Kireystaha

Xaruntaada Adeegga Kireystaha ayaa ah meesha aad ka helayso adeegga tooska ah, aad si fool ka fool ah ula kulmayso shaqaalaha si ay kuu taageeraan aadna u hesho jawaabo degdeg ah oo aad ka hesho shaqaalaha deegaankaaga.

Xarun Kasta, kireysteyaasha ayaa:

- Gudbin kara dalabka shaqada.
- Waxay codsan karaan ogolaanshaha baakinka.
- Waxaad soo gudbin kartaa dukumiintiga dib u eegista kiradaada ee sanadlaha ah ama inaad caawimaad u hesho buuxinteeda.
- Bixin kartaa kirada.
- Waxaad su'aalo ka waydiin kartaa shaqaalaha heshiiskaaga kirada, ijaarka, ama koontadaada.
- Waxaad heli kartaa nuqullada xeerarka kireystaha ee Toronto Community Housing.
- Waxaad soo sheegi kartaa isbadel ku dhacay dakhligaaga.
- Waxaad foomamka u buuxin kartaa soo galaaya ama ka guuraaya gurigaaga.
- Aad u gudbiso cabasho.

Qaar kamid ah Xarumaha Adeegga Kireystaha ayaa furan Isniinta ilaa Jimcada laga bilaabo 8:30 a.m. ilaa 4:30 p.m. Waa la xiraa maalmaha dhammaadka asbuuca iyo maalmaha fasaxa. Haddii saacaduhu ay ka duwan yihiin kuwa Xaruntaada, waxaa lagu soo dhajinayaa albaabka.

Waxaad geli kartaa Xarun inta lagu jiro saacadaha shaqada, laakiin waxaan ku talinaynaa inaad balan qabsato. Ka wac Xarunta Adeegga Macaamiishalambarka **416-981-5500** kadibna ka codso balanta shaqaalaha. Shaqaalaha safka hore ayaa kula soo xiriiri doona 48 saac gudahood si ay u mudeeyaan wakhtiga iyo taariikhda balantaada.

Si aad u hesho Xaruntaada, wac Xarunta Adeegga Macaamiisha ama booqo torontohousing.ca/tenantservicehubs.

Xafiisyada gobalka

Waxaan abuuray Xarumaha Adeegga Kireystaha si aan adeegyada kuugu soo dhawayno goob aad ku qanacsan tahay. Waan ognahay inaad walaacyo ku qabi karto ama u baahan karto inaad soo gudbiso arimo ka baxsan awooda Xarunta deegaankaaga ama Xarunta Adeegga Macaamiisha. Marka sidaas dhacdo, fadlan la xiriir xafiiska Gobalkaaga. Haddii aadan hubin gobalka aad

ku nooshahay, fadlan la xiriir Xarunta Adeegga Macaamiisha kadibna ka codso wakiil.

Xafiisyada gobalka ayaa furan laga bilaabo 8:30 a.m. ilaa 4:30 p.m., Isniinta ilaa Jimcada. Waxaan ku talinaynaa inaad balan ka qabsato Xarunta Adeegga Macaamiisha oo aad ka wacayso **416-981-5500**.

Xafiisyada gobalku waxay ku yaalaan:

- **Galbeedka:** 495 Wilson Ave. (meesha laga galo Champlain Blvd.)
- **Bartamaha:** 49 Lower Jarvis St.
- **Bariga:** 2739 Victoria Park Ave. (galbaleelka taabo si lagaaga furo)

Kormeeraha Guud

Kormeerahaaga guud ayaa ka shaqeeya dhismaha ama dabaqa. Waxay ka shaqeeyaan dayactirka maalin kasta waxayna ka jawaabaan codsiyada adeegga. Waxaad ula hadli kartaa si toos ah, ama waxaad ka wici kartaa lambarka taleefanka tooska ah ee lagu soo dhajiyay dhismahaaga ama Xarunta Adeegga Macaamiisha oo aad ka wacayso **416-981-5500**.

Kadib saacadaha shaqada, la xiriir Xarunta Adeegga Macaamiisha.

Iskuduwaha Adeegga Kireystaha

Iskuduwaha Adeegga Kireystaha (ama TSC) ayaa masuul ka ah:

- la kulmida macaamiisha si loo saxiixo heshiiska kirada
- xisaabinta kirada
- kormeerida hawsha dayn bixinta
- baakinka
- waajibaadka kale si uu kaaga caawiyo kiradaada, ayna ku jirto gudbinta cabashooyinka

Waxaad la xiriiri kartaa Iskuduwaha Adeegga Kireystaha marka aad su'aalo ka qabto kiradaada ama heshiiskaaga kirada. Magaciisa iyo xogta xiriirka ayaa lagu soo dhajiyaa dhismaha. Haddii aadan hubin qofka uu yahay Iskuduwahaaga Adeegga Kireystaha, la xiriir Xarunta Adeegga Macaamiisha oo aad ka helayso help@torontohousing.ca ama **416-981-5500** kadibna ayaga ayaa kugu xiraaya.

Iskuduwaha Adeegga Bulshada

Iskuduwahaaga Adeegyada Bulshada (ama CSC) ayaa u shaqeeya qaabab kaladuwan si ay u taageeran baahiyaha kireyeyaasha Qaar kamid CSC yada ayaa ka shaqeeya barnaamijka badqabka ama adeegyada taageerada, halka kuwo kale ay ka taageeraan kireyeyaasha inay qayb ka noqdaan nidaamyada hogaaminta rasmiga ah.

Shaqaalahaan ayaa la shaqeeya kireysteyaasha, hogaamiyaasha maxaliga ah, iyo wakaaladaha. Waxay doonayaan inay wax ka ogaadaan baahiyaha bulshadaada. Iskuduweyaasha Adeegyada Bulshada ayaa sidoo kale kugu xiraaya adiga iyo dariskaaga adeegyada fursadaha ka jira deegaankaaga.

Magaciisa iyo xogta xiriirka ayaa lagu soo dhajiyaa dhismaha. Haddii aadan hubin qofka uu yahay Iskuduwayaashaada Adeegga Bulshada, la xiriir Xarunta Adeegga Macaamiisha oo aad ka helayso help@torontohousing.ca ama **416-981-5500** kadibna ayaga ayaa kugu xiraaya.

Ilaallada Gaarka ah

Ayadoo qayb ka ah Waaxda Badqabka Bulshada, Toronto Community Housing waxay leedahay Ilaallada Gaarka ah. Waxaan sidoo kale leenahay tiro ilaallada amaanka oo gaar ah kuwaasoo taageera dhismeyaasheena.

Ilaallada Gaarka ah ayaa ilaaliya xaafadaheena, laakiin sidoo kale waxaa loo diraa inay u gurmadaan dhacdooyinka ka dhaca goobo gaar ah. Ilaallada Gaarka ah iyo xubnaha kale ee Waaxda Badqabka Bulshada ayaa si dhow ula shaqeeya wakaaladaha sharci fulinta sida Adeegga Booliiska ee Toronto.

La Taliyaasha Badqabka Bulshada

La Taliyaasha Badqabka Bulshada ayaa ka shaqeeya xal u helida walaacyada badqabka ee bulshooyinka TCHC. Waxay sidoo kale taageero siiyaan gudiyada badqabka ee kireysteyaashu maamulaan. Haddii aad xiiseynayso bilaabida gudiga badqabka ee dhismahaaga, fadlan la xiriir La Taliyaha Baqabka ee Bulshadaada. Magaciisa iyo xogta xiriirka ayaa lagu soo dhajiyaa dhismaha. Haddii aadan hubin qofka uu yahay la taliyahaaga badqabka bulshada, la xiriir Xarunta Adeegga Macaamiisha oo ah help@torontohousing.ca ama **416-981-5500** ayaga ayaana kugu xiri doona.

Waaxda Badqabka Bulshada

Dhammaan kireysteyaasha ayaa xaq u leh inay badqab ku helaan xaafadahooda. Waxaad ka wici kartaa Waaxda Badqabka Bulshada lambarka **416-921-2323** si aad wax uga waydiiso arimaha sida:

- falalka sharci darada ah ama danbiga ah
- jebinta sharciyada baakinka
- ku xad gudubka dhul dadeed

- qaylo xad dhaaf ah

Shaqaalaha ayaa ka jawaabaaya wicitaannada 24 saac maalintii, todobo maalmood asbuucii.

Kooxda xalalka

Haddii aad qabto walaac aan la xalin ama cabasho ku saabsan adeeg ama falka kireyste kale, waxaad la xiriiri kartaa kooxda Xalalka. Kooxda xalalka ayaa maaraysa hawsha cabashooyinka TCHC, ayagoo ka shaqeeya xalka degdega ah ee cabashooyinka kireystaha qaab cadaalad ah, wax ku ool ah oo hufan.

La Xiriir Xalalka haddii:

- Aadan ku faraxsanayn adeegyada aad heshay, aad iskudayday inaad xalka cabashada ka hesho Xarunta Adeegga Macaamiisha ama Xaruntaada Adeegga Kireytaha ee Maxaliga ah aadana wali ku qancin natijooyinka.
- Waxaad khibrad wanaagsan kala kulantay TCHC waxaadna doonaysaa inaad faallo amaan ah ka bixiso shaqaale.

Marka aad la xiriirto Xalalka, waxaad filan kartaa:

- Kooxdeena ayaa xaqiijinaysa codsigaaga hal maalin oo shaqo gudaheed kuuna xaqiijinaaya lambarka tixraaca ee codsigaaga adeegga.
- Kadib baaritaanka, kooxda ayaa ku siin doonta sharaxaad ku saabsan talaabada laq aadaayo si xal loogu helo cabashadaada. Tan waxaa ku jiri doona jadwalka la filaayo haddii cabashada aan loo xalin karin si degdeg ah.

Waxaad ka helaysaa Kooxda xalalka **416-981-6000** ama solutions@torontohousing.ca.

Sida Ioola xiriiro Toronto Community Housing

Shaqaalaha Xarunta Adeegga Macaamiisha ama dhismaha

Waxaad nagala soo xiriiri kartaa:

Si toos ah

Haddii aad dooneyso inaad la hadasho qof aad toos ula kulanto, waxaad la hadli kartaa kormeerahaaga guud. Laakiin waxaad u baahan kartaa inaad booqato xafiiska Xarunta Adeegga Kireystaha ee deegaankaaga (dhismeyaasha qaar).

Si aad u hesho adeeg degdeg ah, xili hore wac si aad balan u qabsato. Haddii aadan hubin meesha xafiiska Xarunta Adeegga Kireystuhu uu ku yaalo, **Xarunta Adeegga Macaamiisha** ayaa kuu sheegaysa.

Taleefanka

Waxaad kala xiriiri kartaa Xarunta Adeegga Macaamiisha 24 saac maalintii lambarka **416-981-5500**.

limeelka

limeel noogu soo dir help@torontohousing.ca haddii aan arintaadu ahayn mid degdeg ah.

Waaxda Badqabka Bulshada

Taleefanka

Waxaad kala xiriiri kartaa Xarunta Gurmada Waaxda Badqabka Bulshada 24 saac maalintii lambarka **416-921-2323**.

Kooxda xalalka

Taleefanka

Waxaad kala xiriiri kartaa kooxda Xalalka **416-981-6000**. Hal maalin gudaheed, kooxd Xalalka ayaa aqbali doonta cabashadaada xaqiijina doonta lambarka tixraaca ee loo sameeyay codsigaaga adeegga.

limeelka

limeel noogusoo dir solutions@torontohousing.ca. Hal maalin gudaheed, kooxd Xalalka ayaa aqbali doonta cabashadaada xaqiijina doonta lambarka tixraaca ee loo sameeyay codsigaaga adeegga.

Shaqaalaha deegaankaaga

Ku qor xogta xiriirka ee Xaruntaada Adeegga Kireystaha ama shaqaalaha kale ee Toronto Community Housing halkaan.

(Waxaad heli doontaa xogtaan marka aad saxiixdo heshiiskaaga kirada, ama waxaad wici kartaa Xarunta Adeegga Macaamiisha oo aad ka wacayso **416-981-5500** xili kasta. Waxaa sidoo kale lasoo gashaa dhismahaaga,)

Ciwaanka Xarunta Kireystaha: _____

Gobalka: _____

Kormeeraha Guud ee Dhismaha

Magaca: _____

Taleefanka: _____ Saacadaha xafiiska:

Iskuduwaha Adeegga Kireystaha (TSC):

Magaca: _____

Taleefanka: _____ limeelka: _____

Wada Shaqaynta Iskuduwaha Adeegga Bulshada (CSC):

Magaca: _____

Taleefanka: _____ lmeelka: _____

Helitanaka iyo Taageerada Iskuduwaha Adeegga Bulshada (CSC):

Magaca: _____

Taleefanka: _____ limeelka: _____

La Taliyaha Badqabka Bulshada (CSA):

Magaca: _____

Taleefanka: _____ limeelka: _____

Waajibaadkaaga ka kireyste ahaan

Ka kireyste ahaan, waxaad xaq u leedahay inaad:

Amaanka kirada

Waxaad ku noolaan kartaa Gurigaaga Toronto Community Housing ilaa:

- Aad ka bixiso ogeysiis qoran (60 maalmood) oo aad siinayso Toronto Community Housing adoo u sheegaaya inaad soo afjarayso kiradaada; ama
- Toronto Community Housing ay soo afjarto kiradaada sabab ku qoran *Sharciga Kirooyinka Guryaha la Dagan yahay*.

Ogeysiis kahor diiwaanka

- Toronto Community Housing waa inay ku siisaa ugu yaraan 24 saac oo ogeysiis ah hore oo qoran ah kahor inta aysan gelin gurigaaga, ilaa inay jirto maahee xaalad degdeg ah ama aad ogolaato inay galaan.
- Shaqaalaha Toronto Community Housing ama qandaraasleyaasha soo gala gurigaaga waa inay haystaan sabab ay ku galaan guriga kuwaasoo waafaqsan *Sharciga Guryaha Kirada ah ee La dagan yahay* ama heshiiskaaga kirada.

Adiga, iyo dadka kula nool, waxaa la yiraahdaa "qoyska". Dhammaan xubnaha qoyskaaga waa inay ku dhaqmaan heshiiska kirada—heshiiska aad la gasho Toronto Community Housing. Waa inaad sidoo kale raacdaa xeerarka Toronto Community Housing aadna ku dhaqantaa sharciga. Halkaan ayaad ka helaysaa liiska waajibaadkaaga ugu muhiimsan:

Inaad bixiso kiradaada aadna soo sheegto isbadellada ku dhaca qoyskaaga

- Aad bixiso kiradaada wakhtigeeda, bil kasta.
- Haddii aad bixiso qiimaha kirada ku saleysan dakhliga, waa inaad soo sheegtaa dhammaan xogta Toronto Community Housing ay kaa codsato si ay dib u eegis ugu samayso kirada sanadkiiba mar.
- Kireysteyaasha kiradooda lagu saleeyay dakhligooda waa inaad u soo

sheegtaa Iskuwahaaga Adeegga Kireystaha 30 maalmood gudahood haddii ay jiraan isbadello gaar ah oo ku dhacay gurigaaga. Haddii aad bixiso kiro ku saleysan dakhliga, waxaad akhrin kartaa qaybta "Soo sheegista isbadellada ku dhaca dakhliga qoyskaaga" oo ku qoran **bogga 53** ee tudmadaan si aad u hesho faahfaahin dheeri ah.

Daryeel gurigaaga

- Nadiifi gurigaaga oo ilaali.
- Dayactir ama bixi qarashka dayactirka waxyeelooyinka adiga, dadka ku soo booqda ama martidaadu sababaan. Tan kuma jiraan dayactirada murmuraxa iyo dildilaaca caadiga ah.
- Waa inaad caymis u samaysataa alaabaha gurigaaga. Tan waxaa caadiyan loogu yeeraa caymiska qaybaha ama kireystaha (xog badan ka eeg **bogga 36**).
- Haddii aad u baaan tahay in qifulka lagaa badelo, ka codso caawimaad kormeerahaaga guud. **Adigu ha badelin qifulkaaga**. Haddii aad u baaan tahay in qifulka lagaa badelo, waxaa lagaa qaadi karaa qarash.
- U sheeg Iskuduwaha Adeegga Kireystaha, qorala ahaan, 30 maalmood gudahood, haddii qof uu guriga soo dego ama uu ka guuro gurigaaga.
- Qaado masuuliyada ficiladaada, ficilada xubnaha kale ee qoyskaaga, iyo martida. Tan waxaa ku jira xayawaankaaga rabaayada ah iyo xayawaanno kasta oo ku soo booqda.

Ixtiraam deriskaaga

- Ha samayn qaylo badan.
- Xakamee oo nadiifi qashinka xayawaanka rabaayda ah. Xayawaannada rabaayada ah waa in lagu wadaa xarig mar kasta oo aad ka bixiso gurigaaga.
- Gacan ka gayso nadiifinta aagaga guud adoo adeegsanaaya qasacyada geerashka ee la dhigay.
- Ixtiraam dhammaan hantida bulshadeena, ayna ku jiraan guryaha kirada, hantida shaqsiga ah, goobaha danta guud, iyo xafiisyada.

Ku noolow gurigaaga oo ha u adeegsan wax ujeedo kale ah

- Waa inaad kala qaybin gurigaaga.
- Ma heli kartid kirooyinka mudada kaaban sida Airbnb.

- Kuma samayn kartid ganacsi gurigaaga adiga oo aan ogolaansho qoran ka haysan Toronto Community Housing.
- Ku dhaqan xeerarka Toronto Community Housing iyo dhammaan sharciyada quseeya.

Xuquuqda aadanaha iyo xuquuqda dadka kale

Toronto waxaa dagan dad badan iyo dhaqanno badan. Toronto Community Housing waxay ilaalisaa kaladuwanaanta bulshada. Waxaan u taagan nahay inaan bixino guriyayn isku dhafan iyo bii'o shaqo. Qof kasta waa in loo qadariyaa si siman loolana dhaqmo si cadaalad ah.

Kireysteyaasha, booqdeyaasha, iyo shaqaalaha ayaa xaq u leh inay ku noolaadaan kana shaqeeyaan goob amaan ah. Tan ayaa ka dhigan qadarin iyo ka caaganaanta takoorka iyo dhibaataaynta.

Toronto Community Housing waxay leedahay *Xeerka Xuquuqda Aadanaha, Dhibaataaynta iyo Helitaanka Cadaalada ah*. Xeerkaan waxaa ku jira waxa sharcigu doonaayo sida ku cad Axdiga Xuquuqda Aadanaha ee Ontario.

Si aad xog badan uga ogaato Xuquuqda Aadanaha ee Toronto Community Housing, ayna ku jirto sida cabasho loo gudbiyo, booqo webseedkeena oo ah torontohousing.ca/human-rights. Waxaad sidoo kale iimeel u diri kartaa humanrights@torontohousing.ca.

Xuquuqda iyo waajibaadka Toronto Community Housing

Waajibaadka Toronto Community Housing ayadoo ahmulkiilaha gurigaaga ayaa ku qoran heshiiskaaga kirada iyo *Sharciga Guryaha Kirada lagu Dagan yahay*. Halkaan ayaad ka helaysaa khulaasada waajibaadkeena anagoo ah mulkiilaha gurigaaga:

- Inaan ku siino adeegyo sida ku cad heshiiskaaga kirada, sharciga, ama labadaba.
- Inay dayactirto gurigaaga kirada ah ayna ka jawaabto codsiyada dayactirka iyo kuwa joogtada ah ee aan degdega ahayn shan maalmood oo kuwa shaqada ah gudahood.
- Inay ku dhaqanto xeerarka iyo sharciyada caafimaadka, badqabka, iyo

hantida ee maxaliga ah iyo sharciga.

- Inay kuu keento cadeynta lacag bixinta marka aad codsato. Tan waxaa ku jiri kara cadeynta kirada ama bixinta qarashka.
- Ka shaqeynta dib u eegista sanadlaha ah ee kirada, haddii aad bixiso kiro ku saleysan dakhliga (RGI).
- Inay ku siiso ugu yaraan 24 saac oo ogeysiis ah kahor inta aysan soo gelin gurigaaga ilaa inay jirto maahee xaalad degdeg ah (daad, dab, dhacdo khatar gelinaysa nolosha ama hubinta badqabka nolosha) ama inaan haysano ogolaanshahaaga si shaqaaluhu u galaan gurigaaga.
- Inaan siino adeegyada macaamiisha dadka naafada ah.

Anagoo ah mulkiilaha gurigaaga, waxaan xaq u leenahay inaan kaa qaadno hormariska kirada oo hal bil ah iyo bisha ugu danbaysa ee kirada haddii aad bixiso qiimaha Kirada Suuqa ama Kirada Guryaha Qiimaha Jaban.

- Lacagaha hormariska ah ayaa loo adeegsadaa lacagta kirada ee bisha ugu danbaysa kiradaada.
- Lacagaha hormariska ah ayaan loo adeegsan karin sabab kasta oo kale, sida bixinta qarashka waxyeelooyinka.
- Lacagta dulsaarta ah ayaa lagu bixin doonaa lacagta hormariska ah sanad kasta.

Guri ka saarida

Anagoo ah mulkiilaha gurigaaga, waxaan xaq u leenahay inaan guriga ka saarno kireysteyaasha aan bixin kirada, lasoo daaha lacagta kirada ama jebiya sharciga dhismaha ee Toronto Community Housing. Waxaad ka helaysaa sababo badan oo guriga lagaaga saari karo **bogga 56**.

Muhiim: Toronto Community Housing ayaan doonayn inay guriga kaa saarto. Waxaan kuligeen kaala shaqeynaa inaad gurigaaga sii daganaato iyo inaan xaqiijino inaad lacagta kirada iska bixiso. Guri ka saaridu waa xalka kama danbaysta ah.

Waxaan u taagan nahay inaan la shaqeyno kireysteyaasha qabi kara dhibaatooyinka dhaqaale. Fadlan la xiriir Iskuduwaha Adeegga Kireystaha haddii aadan bixin karin kirada ama haddii aad qabto dhibaatooyin kale oo la xiriira kiradaada.

Masuuliyada adeegga ee Toronto Community Housing

Waxaad la xiriiri kartaa Xarunta Adeegga Macaamiisha ee Toronto Community Housing 24 saac maalintii, maalin kasta sanadkii. Waxaan samayn doonaa intii karaankeen ah si aan uga jawaabno codsiyada adeegeena.

Dayactirada iyo ilaalinta

Si aad u codsato dayactir, fadlan wac Xarunta Adeegga Macaamiisha lambarka **416-981-5500**.

- Waxaan ka jawaabnaa codsiyada dayactirada joogtada ah iyo ilaalinta shan maalmood oo kuwa shaqada ah gudahood.
- Dayactirada xaalada degdega ah ama ilaalinta ayaa si dhakhso ah loo xalin doonaa.
- Waxaan kaala shaqeyn doonaa helitaanka xal waara.
- Haddii aysan ahayn xaalad degdeg ah, waxaad iimeel u diri kartaa help@torontohousing.ca.
- Wakiiladeena ayaa ku siinaaya lambarka tixraaca gaarka ah oo aad u adeegsan karto marka aad wax ka waydiinayso codsigaaga. Haddii aysan ku siin lambarka tixraaca, keliya ka codso.
- Haddii aad naafo tahay, kudar qaybtaan kamid ah codsigaaga. Ayadoo ku xiran xaalada, waxaan u baahan karnaa inaan muhiimada siino ama

ku jawaabno qaab kale.

Dayactirada xaalada degdega ah

Marka aad codsato dayactirka xaalada degdega ah, shaqaale ama adeeg bixiye ayaa imaan doona gurigaaga afar saacadood gudahood, ayadoo ku xiran nooca dayactirka. Tan waxaa ku jira dayactirada xaalada degdega ah ee loo baahan yahay habaynkii ama maalmaha dhammaadka asbuuca. Waxaan iskudayi doonaa inaan xalino isla markaba caqabada ama inaan samayno dayactir ku meel gaar ah si aan uga joojino inay kasii darto. Marka dayactir ku meel gaar ah la sameeyo, shaqaalaha ama adeeg bixiyaha aya soo laaban doona shan maalmood gudahood si uu u sameeyo dayactir rasmi ah.

Barnaamijka helitaanka ee TCHC

Toronto Community Housing waxay u taagan tahay xaqiijinta in bulshooyinkeena iyo adeegyadeena ay heli karaan dadka naafada ah. Tan waxaa lagu sameeyaa mabaadii'da soo socota ee aasaasiga ah ee Axdiga Xuquuqda Aadanaha ee Ontario iyo heerarka helitaanka ee Sharciga Helitaanka Adeegyada ee Dadka Ontario ee Naafada ah (AODA).

Barnaamijka Helitaanka ayaa siinaaya dadka kireysteyaasha ah ee naafada ah fursad ay ugala shaqeeyaan shaqaalaha TCHC samaynta isbadellada gelitaanka guryahooda iyo aagaga guud. Xog badan ka ogoow caawimaadaha helitaanka torontohousing.ca/accessibility.

Wax ka badelka guriga

Wax ka badelka gelitaanka guriga sida gacannada la cuskado, qalabka korontada oo joogooda hoos loo dhigo, ama albaabada la balaarshay ayaa kaa caawinaaya inaad si badqab ah ku jooqto aadna si wanaagsan ugu shaqeyso gurigaaga. Wax ka badellada guriga lacag la'aan ayaa loogu samaynayaa kireysteyaasha waxaana samaynaaya Barnaamijka Helitaanka. Mararka qaar, isbadellada fudud, sida gacannada la cuskado, ayaa lagu samayn karaa dhawr maalmood gudahood.

Hawshu waxay ku bilaabataa in xirfadle caafimaad uu buuxsho foomka su'aalaha ee Caafimaadka ee TCHC.

1. Foomka Su'aalaha ee Caafimaadka TCHC ayaa lagu heli karaa qaababka soo socda:
 - Oonlayn ahaan uga fiiri torontohousing.ca/accessibility-program.
 - Waxaad Nuqul ka codsan kartaa Iskuduwahaaga Adeegga Kireystaha (TSC) ee Xaruntaada Adeegga Kireystaha.
 - Waxaad codsan kartaa Helitaanka oo qayb ka ah Adeegaaga, kaasoo ay ku jiraan Foomka Ssu'aalaha Caafimaadka, oo aad ka qaadanayso xafiiska qaabilaada ee Xaruntaada.
 - Waxaad kala xiriiri kartaa Xarunta Adeegga Macaamiisha lambarka **416-981-5500** ama help@torontohousing.ca kadibna ka codso inay foomka kuu soo diraan.
2. Foomka su'aalaha Caafimaadka waa inuu buuxshaa xirfadle caafimaad oo tayo leh kaasoo ruqsad ka haysta Canada. Wuxuu noqon karaa dhakhtar, kalkaaliso diiwaan gashan, baxnaaniyaha shaqada, iyo kuwo kale.
3. Marka Foomka Su'aalaha Caafimaadka la buuxsho, nuqul kala bax si aad u haysato.
4. Ku celi Foomkaaga su'aalaha Caafimaadka ee aad buuxiso TSC ka Xaruntaada. Haddii aadan nuqul kala bixin, ka codso shaqaalaha inuu nuqul kaaga bixiyo. Ka codso shaqaalaha inay tiimbaraha wakhtiga ku dhajiyaan ayna saxiixaan nuqulkaaga Foomka Su'aalaha Caafimaadka. Lambarka tixraaca ayaa loo samayn doonaa codsigaaga. Xaqiiji inaad haysato diiwaanka lambarkaas maadaama ay kaa caawinayso dabagalka codsigaaga.
5. Haddii codsigaagu quseeyo caawimaad yar sida kor u qaadista fadhiga musqusha ama gacannada la cuskado, codsigaga ayaa loo gudbin doonaa kormeeraha guud si uu u fuliyo.

6. Haddii codsigaagu u baahan yahay wax ka badan caawimaad yar, Foomkaaga Su'aalaha Caafimaadka ayaa loo diri doonaa Iskuduweyaasha Barnaamijka Gelitaanka si qiimeyn loo sameeyo. Haddii la ogolaado, hanaanka cusbooneysiinta gurigaaga ayaa bilaaban doona. Haddii aan la ogolaan, waxaad heli doontaa waraaqda diidmada oo sharxaysa sababta loo diiday. Racfaan ayaad ka qaadan kartaa haddii la diido codsigaaga isbadellada.

Si aad xog badan uga ogaato hawsha, la hadal Iskuduwahaaga Barnaamijka Helitanaka. Haddii aadan ogayn qofka uu yahay Iskuduwaha Barnaamijka Gelitaanka, la xiriir Xarunta Adeegga Macaamiisha oo aad kala xiriirayso **416-981-5500** kadibna way ku hagi karaan.

Isbadellada aagaga guud

Haddii aad isleedahay waxaa jira isbadello looga baahan yahay aagaga guud ee dhismahaaga, fadlan raac hanaankaan:

1. La xiriir kormeerahaaga guud. Waxaad u baahan doontaa inaad u sharaxdo waxa caqabada helitaanku tahay, waxaana ku talinaynaa inaad sawiro iska qaado.
2. Kala xiriir Xarunta Adeegga Macaamiisha lambarka **416-981-5500** si aad qaab rasmi ah ugu soo gudbisno arin jirta. U sheeg in aad hayso sawirada caqabada gelitanaka kadibna waxay ku siin doonaan xogta meesha aad sawirada u diri karto. Xasuusnoow inaad hesho lambarka tixraaca.
3. Codsiga ayaa loo dhiibi doonaa kooxda ay qusayso si ay u eegaan.

Waxaad sidoo kale la xiriiri kartaa Gudiga R-PATH si ay kuu caawiyaan.

Waa maxay R-PATH?

Gudiga Gaarka ah ee Masuulka ka ah Gelitaanka ee Toronto (R-PATH) waa koox ay kireysteyaashu hagaan oo kala shaqeeya TCHC aqoonsiga iyo xalinta caqabadaha gelitanaka bulshooyinkeena. Yoolka gudigu waa in kor loo qaado tayada nolosha dadka qaba naafooyinka jirka. Waxay sidoo kale ka taageeraan Toronto Community Housing inay hogaanka u qabato guryaha la

geli karo. Kireysteyaasha ayaa la xiriiri kara R-PATH si looga caawiyo cilada gelitaanka. La xiriir Cathy Birch, Gudoomiyaha Gudiga, oo aad ka helayso cbirch619@msn.com ama **647-201-7941**.

Xog badan ka ogoow shaqada R-PATH iyo sida looga qaybgalo barta torontohousing.ca/r-path.

Hawsha aqoonsiga iskaa ah ee badqabka xaaladaha degdega ah

Haddii aad u baahan tahay caawimaad dheeri ah inta lagu jiro xaalad degdeg ah, hanaanka Aqoonsiga Shaqsiga ah ayaa ah qaab kireysteyaasha naafada ah ay si qarsoodi ah iskugu sheegi karaan TCHC. Shaqaalaha gurmada degdega ah iyo shaqaalaha xarunta ayaa u adeegsan doona xogta inay xaqiijiyaan inaad hesho caawimaada aad u baahan tahay inta lagu jiro xaalada degdega ah ama daadguraynta dhismaha. Hawsha Aqoonsiga shaqsiga ah waa ikhtiyaari waxaana loogu talo galay in lagu sugo badqabkaaga. Waxaad ka heli kartaa nuqulka foomka torontohousing.ca/selfid ama Xaruntaada Adeegga Kireytaha. Haddii aad tahay kireytaha RGI, foomkaan waxaa sidoo kale ku jira baakadaada Dib U eegista Sanadlaha ah.

Codso qaab kale

Waxaan fahmaynaa in baahiyaha helitaanku aysan isku mid u ahayn qof kasta. Haddii aad u baahan tahay in wax kamid ah xogta TCHC (qoraal ama oonlayn) loo turjumo luuqad kale ama qaab kale sida far waawayn, galka elektarooniga ah ee shaashadu akhrin karto, kala xiriir Xarunta Adeegga Macaamiisha lambarka **416-981-5500**.

Taageero dheeri ah

Caawimaad ayaa laga heli karaa wakaaladaha banaanka si loo taageero shaqsiyaadka la nool naafada si ay ugu noolaadaan si madax banaan ayna si buuxda uga qaybgalaan nololshada bulshada. Maal gelinta iyo caawimaada ayaa laga heli karaa wakaaladaha sida:

- Ontario March of Dimes, Barnaamijka Aaladaha Caawimaada
 - **1-866-765-7237**

- Easter Seals Ontario, Aakadaha Kaalmaatiga ah (ee codsadeyaasha kayar 19)
 - **416-421-8377**
- Multiple Sclerosis Society of Canada, Laanta Toronto, Barnaamijka Maalgelinta
 - **416-967-3033**

Si aad u hesho xog guud iyo taageero, kala xiriir Xarunta Nololsha Madaxa Banaan ee Toronto **416-599-2458**.

Hawsha cabashada ee Toronto Community Housing

Waxaan kugu boorinaynaa inaad nala soo xiriirto haddii aad qabto caqabad aan la xalin. Tan ayaa naga caawinaysa kor u qaadista sida aan ugu adeegno kireysteyaasha.

Cabashada ayaa ka duwan codsiga adeegga ama su'aasha kirada. Haddii aad qabto cilad qusaysa dayactirka ama su'aal ku saabsan kiradaada, la xiriir shaqaalaha dhismaha, Xarunta Adeegga Kireystaha ee deegaanka ama Xarunteena Adeegga Macaamiisha.

Haddii aad horey u gudbisay codsiga aan horey loo xalin, aadna arinta soo gudbisay, waxaad soo gudbin kartaa cabasho. Kala xiriir Kooxda xalalka lambarka **416-981-6000** ama iimeelka solutions@torontohousing.ca.

Si aad xog badan uga ogaato hawsha cabashooyinka, booqo torontohousing.ca/complaints.

Soo sheegista khiyaannada iyo khasaarada

Laynka tooska ah ee khiyaannada: soo sheeg khiyaannada iyo khasaarada isla markaba

Khiyaannada iyo khasaarada ayaa saamayn ku leh qof kasta oo ku nool Toronto Community Housing. Lacagta ku lunta khiyaannada ayaa ka dhigan in Toronto Community Housing aysan lacag badan u heli doonin maal gelinta barnaamijyada iyo adeegyada kireysteyaashu u baahan yihiin.

Haddii aad aaminsan tahay inaad aragtay shaqaale, kireyste ama adeeg bixiye ku kacaaya khiyaano ama khasaarinaaya hantida si kas ah ama qaab dayac ah, waxaan kugu boorinaynaa inaad noosoo sheegto isla markaba.

Toronto Community Housing waxay shaqaalaysiisay adeeg bixiye madax banaan, ClearView Strategic Partners, si ay u qabtaan wicitaannada la xiriira khiyaannada iyo khasaarada laga shakiyay. Waxaad soo gudbin kartaa walaaca aad qabto xili kasta, adoo adeegsanaaya luuqadaada hooyo aana sheegin magacaaga. Wicitaannada ayaa laga jawaabaa 24 saac maalintii, 365 maalmood sanadkii.

Booqo torontohousing.ca/report-fraud si aad xog badan uga ogaato qaabka ClearView Connects u shaqayso, sida laynka toosta u difaacaayo aqoonsigaaga.

Maxaa dhacaaya marka aad warbixin soo gudbiso?

Waaxda Baaritaanka ee Toronto Community Housing ayaa dib u eegis ku sameeya dhammaan arimaha quseeya khiyaannada iyo khasaarada ee lagu soo gudbiyo laynka khiyaannada ee tooska ah. Waaxdaan ayaa qayb ka ah Waaxda Adeegyada Sharciga. Adeegyada Sharciga ayaa wargelin u dirta madaxeena sharciga, Gudoomiyaha Guud iyo Xoghayaha Shirkada.

Sadexda qaab ee warbixinta loosoo gudbiyo

- **Taleefanka:** Wac laynka tooska ah ee khiyaannada **1-866-781-7956**. Waxaa jira dookha aad fariin codeedka ku reebi karto.
- **Oonlaynka:** Adeegso foomka oonlaynka amaanka ah oo aad ka helayso clearviewconnects.com.

- **Boostada:** Cabashadaada u dir ClearView Connects, PO BOX 11017, Toronto, ON, M1E 1N0.

Soo degista

Kahor inta aadan soo degin, gurigaaga ayaa la nadiifinayaa, dib loo dayactiraa lana kormeeraa. Sidoo kale waxaa laga buufiyaa cayayaana, haddii loo baahdo. Kormeerahaaga guud ayaa kula samayn doona kormeerka u soo guurista ogaana doona dayactiro kasta oo aad sheegto.

Kormeeraha guud ayaa eegi doona noocyada isbadellada aad ku samayn karto iyo kuwa aadan ku samayn karin gurigaaga. Waxaa lagugu yeelan karaa lacag marka kiradaadu dhammaato haddii aad isbadello bilaa idan ah samayso ama haddii aad guriga waxyeelayso. Tan waxaa loogu yeeraa "lacagta qaanta ah".

Wiishashka iyo gaynta alaabaha

Dhisme kasta oo ay leedahay Toronto Community Housing waa ka duwan yahay kuwa kale.

- Haddii aad ku soo guurayso dhisme dabaq ah, kala hadal kormeerahaaga guud inuu u xiro wiish maalinta aad soo guurayso. Waxaad sidoo kale la xiriiri kartaa Xarunta Adeegga Macaamiisha si aad codsigaan u gudbiso. Wakiil ayaa ku siin doona lambarka tixraaca kalana shaqeyn doona kormeerahaaga inuu wiishka kuu furo.
- Maalinta aad soo guurayso, waa inaad la xiriirtaa Xarunta Adeegga Macaamiisha labo saacadood kahor inta aadan soo guurin si ay qof u geeyaan wiishka shaqada.

Haddii aad wadato alaabo cusub (sida alaabta guriga) oo la keeno dhismha, ka codso kormeerahaaga guud xog ku aadan sida alaabaha la keeno loo maareynaayo.

Ka saarida

Sida ku cad qodobada heshiiska kirada, isbadellada rasmiga ah ayaan la ogolayn marka guriga la sharxaayo. Tusaale, ma awoodid inaad:

- Badesho sagxada.
- Bixiso albaabada, qaanadaha, tuubooyinka, ama qotomada nalka.

- Ma waxyeelayn karid dalbiyada adoo adeegsanaaya nusbaaro ama ganno. Keliya adeegso gannaha sawirka ee darbiga qabsada oo aan waxyeelo u gaysanayn darbida ama riinjiga.

Haddii aad isbadello rasmi ah samayso, waxaa lagaa qaadi doonaa qarashka ku celinta guriga sidii uu ahaa markii aad soo degtay.

Markasta codso ogolaansho kahor inta aadan wax isbadello ah ku samayn guriga. Waxaad kala hadli kartaa isbadellada suuragalka ah Iskuduwaha Adeegga Kireystaha ama shaqaalaha kale ee Xaruntaada Adeegyada Kireystaha.

Guurista

Bixinta ogeysiiska

Marka aad doonayso inaad guurto, waa inay keentaa ogeysiis qoraal ah 60 maalmood (labo bilood oo buuxda) kahor marka aad guurayso. Fadlan u gudbi ogeysiiskaaga guurista Iskuduwaha Adeegga Kireystaha.

Waa inaad saxiido foom la yiraahdo N11 (“Aqbalaada Soo Afjarida Kirada”) marka aad ka guurayso gurigaaga. Haddii aad adigu ka guurayso guriga ayna xubnaha kale ee qoyskaaga iyo kireysteyaasha kale ay wali sii daganaan doonaan guriga, waa inaad saxiixdaa aadna taariikhda ku qortaa waraaq xaqiijinaysa taariikhda aad ka guureyso guriga aadna waraaqda siisaa Iskuduwaha Adeegga Kireystaha. Xubnaha qoyska ee soo haray ayaa u baahan kara inay la saxiixdaan heshiiska cusub ee kirada Toronto Community Housing marka aad ka guurto guriga.

Soo celinta fureyaasha iyo silisyada furaha

Kahor inta aadan bixin, waa inaad soo celisaa dhammaan fureyaasha guriga. Tan waxaa ku jira fureyaasha sanduuqa boostada, silisyada furaha, fureyaasha aaga baakinka, iyo calaamadaha baakinka. Sii kormeerahaaga guud. Haddii aadan soo celin agabkaan, qarashkooda ayaad bixinaysaa.

Lacagaha kama danbaysta ah ee kirada

Waxaa lagaa qaadi doonaa kirada ilaa dhammaadka bisha aad guurayso. Waxaa lagaa qaadi doonaa kirada ilaa dhammaadka bisha kiradaadu dhamaato. Tusaale:

- Haddii aad keentay ogeysiiska qoran 1dii Maarso, waxaad bixin doontaa kirada Maarso iyo Abriil waxaadna guuraysaa kahor Maajo 1deeda.
- Haddii aad keentay ogeysiiska qoran 15ka Febraayo, waxaad bixin doontaa kirada Febraayo, Maarso, iyo Abriil waxaadna guuraysaa kahor Maajo 1deeda.

Kireysteyaasha Qiimaha kirada Suuqa iyo Kirada Qiimaha jaban ayaa bixinaaya lacagta hormariska ah ee bisha koobaad iyo bisha labaad ee kirada marka ay soo galaan guriga. Lacagaha hormariska ah u adeegsan doonaa lacagta kirada ee bisha ugu danbaysa kiradaada.

Kormeerka

Shaqaalaha Toronto Community Housing ayaa kormeeri doona gurigaaga waxyar kadib marka aad bixiso ogeysiiskaaga qoran. Way kormeeri doonaan markale kadib marka aad guurto. Gurigaagu waa inuu ku jiraa xaaladiisa rasmiga ah. Waxaa lagaa qaadi doonaa qarashka waxyeelo kasta oo ku dhacda gurigaaga, marka laga soo tago murmurxa caadiga ah. Tan waxaa la yiraahdaa "lacagta qaanta ah".

Adiga ayaa bixinaaya qarashka dayactirka waxyeelo kasta oo aad u gaysato guriga. Haddii gurigaagu wasaq yahay ama haddii aad alaab uga tagto, waxaa lagaa qaadi doonaa qarashka nadiifinta ama qashin gaynta alaabta.

Dhismahaaga waa in lagu soo ceshaa sidii uu ahaa. Tusaale, haddii aad wool beebar ku dhajiso darbiga, waa inaad meesha ka fujisaa. Haddii aad darbida ku dhajisay midab kale, waa inaad ku celisaa midabkii orjinaalka ahaa.

Gurigaaga: xogta nolol guul leh

Gelitaanka gurigaaga

Gurigaagu waa hooygaaga waana qadarinaynaa xaqiiqadaan. Hase yeeshee, waxaa jiri karta mararka shaqaalaha iyo qandaraasleyaasha Toronto Community Housing ay u baahan karaan inay guriga galaan. Waxay u baahan karaan inay galaan gurigaaga inta lagu jiro xaalad degdeg ah, ama waxay u

baahan karaan inay galaan si ay u sameyaan dayactir, u kormeeraan gurigaaga, ama u tusaan kireysteyaal cusub haddii aad guureyso. Waxaad ka codsan kartaa qandaraasleyaasha inay keenaan aqoonsiga sawirka leh ee Toronto Community Housing kahor inta aysan gelin gurigaaga.

Sharciga Guryaha Kirada ah ayaa naga doonaaya inaan ku siino ogeysiis qoran ugu yaraan 24 saac kahor inta aanaan gelin gurigaaga, marka laga reebo xaalada degdega ah.

Caawimaada la heli karo

Toronto Community Housing waxay caawisaa kireysteyaasha qaba naafooyinka jirka ayadoo isbadello ku samaysa guryaha (ku xirta gacannada la cukado, balaarisa albaabada) iyo hormarinno lagu sameeyo aagaga guud ee dhismeyaasha. Mararka qaar, caawinta kireysteyaasha naafada jireed qaba ayaa ka dhigan in loo wareejiyo guri ku haboon. Si aad u hesho xog dheeri ah, kala hadal Iskuduwaha Adeegga Kireystaha buuxinta dukumiintiga loo baahan yahay si loo codsado caawimaada helitaanka.

Waxaad sidoo kale xog badan ka ogaan kartaa Barnaamijka Helitaanka **bogga 21** ee tasmadaan ama booqo torontohousing.ca/accessibility.

Mukeyfyada

Mukeyfyada cusub ee daaqada ayaan loo ogolayn dhismaha Toronto Community Housing. Mukeyfyada la qaadan karo ee dhulka la dhigto ayaa la ogol yahay haddii aysan abuurayn khatar badqabka ah.

Laga soo bilaabo ilaa sanadkii 2018, TCHC ayaa adeegsanaysay qaabka kala qaybsan si ay meesha uga saarto mukeyfyada daaqadaha. Waxaan guryahaan ku xirnay qaybo cusub, oo tamarta ilaalinaaya, oo dhulka lagu dhajiyo. Haddii qalabkaaga mukeyfka daaqada meesha laga saaray, laguuma ogola in aad dib u soo rakibto. Haddii aad qalabka cusub ee AC ku xirto daaqada, waxaa lagaa doonayaa inaad meesha ka saarto.

Waxaa wali jira qalabka AC oo daaqadaha ku xiran kuwaasoo aan wali la badelin. Qalabkaan ayaa badanaa ku xiran balakoonnada. AC yadaan daaqada ayaa meesha ku xirnaan kara ilaa aan ka badelayno sanadaha soo socda.

Kormeerada guriga ee sanad kasta

Halmar sanad kasta, kormeerahaaga guud ayaa kormeeraaya gurigaaga si uu u xaqiijiyo:

- In ganbaleellada qiiqa iyo kaarboon monoxide ay shaqaynayaan.
- In muraayadaha shaashadaadu aysan jabin, qufulada daaqaduhuna shaqeynayaan aanana la halayn.
- Uusan jirin qashin xad dhaaf ah, khataraha dabka ama ciladaha cayayaanka.
- Aysan jirin dayactiro waawayn oo loo baahan yahay.

Kormeerka dhismaha ee sanad kasta ayaa ah wakhtiga TCHC ay hubiso baahiyaha dayactirka waawayn, ku dhaqanka heerarka ruqsada ee magaallada, iyo Heerarka Gelitaanka ee TCHC.

Bil kasta, shaqaalaha Toronto Community Housing ayaa tijaabiya ganbaleellada dab damiska iyo nidaamyada kale ee badqabka nolosha ee ku xiran aagaga guud ee dhismaha.

Qalabka korontada

Toronto Community Housing ayaa ku xirta guri kasta talaagad, shoolad iyo ofen. Haddii qalabkaaga korontadu u baahan yahay in la badelo ama la dayactiro, wax Xarunta Adeegga Macaamiisha. Shaqaalaha ayaa nidaamin doona adeegga inta lagu jiro saacadaha caadiga ah ee shaqada.

Haddii qalabkaagu u baahan yahay dayactir ama in la badelo kadib saacadaha shaqada ama maalmaha fasaxa asbuuca, shaqaalaha Toronto Community Housing ayaa imaan doona gurigaaga si ay u qiimeeyaan waxa loo baahan yahay. Haddii aysan dayactiri karin qalabka, adeeg bixiye ayaa loo diri doonaa maalinta xigta.

Dhismeyaal badan ayaa leh qolalka dhar dhaqaalka oo la furo lana xiro wakhtiyo gaar ah. Kireysteyaasha looma ogola inay ku xiraan mashiinka dhar dhaqaalka qalajiye, ama mashiinka weelasha dhaqa guryahooda. Rakibaada mashiinadaan waxay waxyeelo u gaysan kartaa tuubooyinka dhismahaaga, waxay sababi kartaa daadad ama khasaarada biyaha oo ku dhacda adiga ama

dariskaaga, ama waxay abuuri kartaa dhibaatooyin kale.

Haddii aad rakibato qalabka korontada ama adeegsato qalab aysan ku siin Toronto Community Housing, waan ka saari doonaa guriga waxaana kaa qaadi doonaa dayactirka ama waxyeello kasta oo ay gaysteen.

Balakoonnada

Marna ilmaha iyo xayawaannada oo keligood ah ha uga tagin balakoonka.

Agabkaan looma ogola balakoonkaaga:

- Roogaga maadaama ay waxyeelayn karaan shubka iyo alwaaxa marka ay qoyaan.
- Foonada ama qalabka wax lagu solo maadaama ay abuurayaan khatarta dabka.
- Agabka aad kaydinaayso. Inaad balakoonkaaga u adeegsato kayd ahaan waxay abuuraysaa khatar dhanka dabka ah.
- Qasacyada iyo aashuunnada geedaha lagu beero looma ogola dusha cirifyada balkoonnada.

Marna wax haka tuurin balakoonkaaga. Waxaad dhaawac xun u gaysan karta dadka ka hooseeya ama waxaad burburin kartaa hanti. Waxaa lagugu qanaaxi karaa haddii aad haashka sigaarka ka tuurto balakoonkaaga. Sigaarka ayaa ah sababta ugu badan ee dab uga kaco balakoonka. Waxay sidoo kale dab ka kiciyaan cawska hoose,

Adeegso rakada dhar qalajinta si aad dhar ugu warato balakoonkaaga, ha adeegsan xariga dharka.

Haddii aad dooneyso inaad shabaq ku xirto balakoonkaaga, fadlan la xiriir Xafiiska Gobalka si aad u hesho xog dheeri ah.

Qashinka, wasaqda dhirta iyo dib u warshadeynta.

Xeerar ku saabsan fageynta qashinka ayaa kaladuwan dhisme kasta. Fadlan kala sooc agabkaaga dib loo warshadeeyo iyo qashinka dhirta (cuntada)

marka aad qashinka ku darayso. Ku rid qashinkaaga jawaanka ama qasacyada saxda ah ee dhismahaaga, ama qasacyada banaanka dhismahaaga haddii aadan haysan jawaanno. Eeg tilmaamaha ku dhagan dhismahaaga ama waydii kormeerahaaga guud.

Fadlan qaado dooraaga oo:

- Ku xir dhammaan qashinka baco yaryar kuna rid haanta qashinka.
- Labo bacood ku xir qashinka biisada iyo xafaayadaha kuna dar qashinka oorganiga ah sida ku haboon.
- Iska ilaali inaad ku rido dhalooyinka, qasacyada aarsoolka ama agabka waawayn haanta qashinka. Waydii kormeerahaaga guud meesha iyo sida aad agabkaan qashinka ugu darayso.
- Ka codso kormeerahaaga guud meesha aad gaynayso alaabta guriga ama alaabta kale ee waawayn ee qashinka lagu daraayo.
- La xiriir kormeerahaaga guud haddii aad u baahan tahay inaad qashinka ku darto qalabka yaryar ama baytariyada.
- Iska ilaali inaad qashinka khatarta ah ee guriga, sida kiimikooyinka sunta ah ee nadaafada, ku rido qashinka. Waydii kormeerahaaga guud meesha iyo sida aad agabkaan qashinka ugu darayso.
- Yaree, dib u warhadee oo dib u adeegso, alaabta inta ugu badan ee suuragalka ah.

Ilaalinta tamarta iyo biyaha

Waxaan isbadello ku samaynaynaa dhismeyaasheena si ay nooga caawiyaan badbaadinta tamarta iyo biyaha. Waxaad samayn kartaa qaybtaada.

Si loo badbaadsho tamarta iyo gaaska dabiiciga ah:

- Adeegso biyaha qaboow marka aad dharka dhaqanayso.
- Adeegso rakada dhar qalajinta (ha adeegsan xariga dharka) si aad dharka ugu qalajiso balakoonkaaga badelkii aad adeegsan lahayd qalajiyaha.

- Ha furin daaqadaha xiliga qaboobaha. La xiriir Xarunta Adeegga Macaamiisha si aad u soo sheegto daaqadaha aan si sax ah u xirmayn. Haddii aad kulayl dareento xiliga qaboobaha uuna kuu yaalo qalabka heerkulka, iska gaabi. Haddii aadan haysan qalabka heerkulka, la hadal kormeerahaaga.
- Haddii aad dareento qaboow xad dhaaf ah xiliga qaboobaha, ha u adeegsan ofenka si aad u diiriso gurigaaga. Waxay khasaarinaysaa korontada mana ahan mid badqab ah. La hadal kormeerahaaga si aan u helno cilada aana u xalino.
- Haka dagin albaabka talaagada oo furan. Haku xirin talaagada heerka qaboowga badan.
- Dami nalalka marka aad qolka ka baxdo.
- Marka aad soo iibsanaayo qalabka korontada, ka eeg calaamda Energy Star. Qalabka korontada ee calaamadaan leh ayaa isticmaala tamar yar.
- Dami TV yada, idaacadaha, iyo kumbuyuutarada marka aan la isticmaalayn. Waxaan ku talinaynaa in aad adeegsato qaybta Daminta-daarista si aad ugu dabiso hal mar.

Si loo ilaaliyo biyaha:

- Muddo kooban ku qubayso.
- Haka tagin biyo iska socda marka aad cadayanayso.
- Mar kasta qasaalada ku dhaq dharka oo buuxa.
- U soo sheeg tuubooyinka iyo musqulaha dilaacsan Xarunta Daryeelka, oo kala soco shaqaalaha goobta.

Haddii aad qabto su'aalo ku saabsan wada sheekaysiga dhismahaaga, la hadal kormeerahaaga guud ama wac Xarunta Adeegga Macaamiisha.

Kulaylka

Shaqaalaha daba damiska ayaa la socda heerkulka dhammaan dhismaha. Sharciyada Toronto ayaa qasab ka dhigaaya in heerkulka dhismeyaasha dabaqa ah uu ahaado ugu yaraan 21 digrii Celsius laga bilaabo Sibteembar 15 ilaa Juun Juun 1. Waxaan ku dhaqannaa sharcigaan marka aan shidno kulayliyaha aana damino.

Ma jiro sharci cayimaaya heerka ugu sareeya heerkulka. Toronto Community Housing ayaa la socota xaaladaha inta lagu jiro mudooyinka kulaylka daran. Haddii aad ka walaacsan tahay heerkulka gudaha gurigaaga, wac Xarunta Adeegga Macaamiisha.

Caymiska

Ma leedahay caymiska alaabtaada? Adiga ayaa masuul ka ah, sida ku cad heshiiskaaga kirada, inaad caymis u hesho alaabtaada. Caymiska noocan ah ayaa caadiyan loogu yeeraa caymiska alaabta ama caymiska kireysteyaasha.

Caymiska Toronto Community Housing ayaan bixin doonin badelka hantidaada haddii waxyaabaha sida dabka, daadka ama waxyeelooyin kale ay ku dhacaan gurigaaga.

Haddii qaar ama dhammaan dakhliga aad ka hesho Ontario Works ama Barnaamijka Taageerada Naafada ee Ontario, barnaamijyadaan ayaa dabooli kara qarashka caymiska qaybaha. Fadlan kala hadal shaqaalaha kiiskaaga si aad xog dheeri ah u ogaato.

Muxuu caymisku qabanayaa?

Caymisku wuxuu kaa caawin karaa inaad bixiso qarashka badelka alaabtaada haddii gurigaaa waxyeelo kasoo gaarto daadka, dabka ama dhacdo kale Tan waxaa ku jira cuntada halaabi karta haddii korontadu muddo dheer maqnaato.

Caymiska ayaa gacan ka gaysan kara daboolista qarashaadka la xiriira sheegashada aad masuulka ka tahay, sida dabka jikada ama haddii xayawaankaagu qaniino qof.

Caymiska ayaa sidoo kale dabooli kara qarashka joogista isbitaalka ama guriga badelka ah haddii aad ka baxdo gurigaaga sabab la xiriirto waxyeelo dabeed, daadka ama xaalada kale ee degdega ah.

Caymiska qiimaha jaban

Marsh Canada ayaa bixisa caymis loogu talo galay kireysteyaasha ku nool guryaha dawlada. Waxaad ka heli kartaa xog ku saabsan qiimeyasha iyo caymiska tenant.hscorp.ca ama inaad wacdo **1-866-940-5111**.

Haddii aad qabto su'aalo ku saabsan nooca caymiska kugu haboon, wac Laanta Caymiska ee Canada oo aad ka helayso **416-362-9528**, Isniinta ilaa Jimcada, laga bilaabo 8 a.m. ilaa 5 p.m.

Fureyaasha iyo silisyada furaha

Toronto Community Housing ayaa ku siin doonta fureyaal iyo silisyada furaha gurigaaga. Haddii aad ku nooshahay dhisme dabaq ah, waxaad helaysaa fureyaasha sanduuqa boostada. Waxaad sidoo kale helaysaa silisyada fureyaasha albaabka hore ee dhismaha iyo aagaga kale ee guud.

Haddii adiga ama qof kamid ah qoyskaagu uu qabo naafo, waxaad sidoo kale heli kartaa rimuudka gurigaaga iiyo dhismaha, iyo fureyaasha albaabka ee otomaatiga ah ee guryaha la geli karo.

Kireysteyaasha looma ogola inay badelaan ama ku daraan qufullada. La hadal kormeerahaaga guud haddii aad u baahan tahay nuqullada dheeriga ah ee furaha, ama haddii aad lumiso fureyaasha aadna u baahan tahay in la badelo qufullada. Marka ay jirto xaalad degdeg ah ama saacadaha shaqada kadib, wac Xarunta Adeegga Macaamiisha lambarka **416-981-5500**. Waxaa lagaa qaadi karaa qarashka badelida qufulka, cilad bixinta quful jabay, ama badelida albaabka otomaatiga ah.

Ha siin nuqullada fureyaashaada ama silisyada dadka aan qaybta ka ahyn gurigaaga. Arintaan ayaa khatar gelinaysa badqabka qof kasta waxayna jebinaysaa heshiiskaaga kirada.

Marka aad guurto, ku celi fureyaashaada kormeerahaaga guud maalintaada ugu danbaysa.

Muhiim: waxaa lagaa qaadi karaa lacag dhan \$99 si loo badelo qufullada iyo \$25 si loo badelo silisyada. Haddii aad adeegsato rimuud si aad u gasho gurigaaga, badelida ayaa ku kacaysa \$75.

(Kuwaan ayaa ah qiimeyaasha Diseembarka 20222. Qiimeyaasha ayaa kordhi kara sanadaha soo socda.)

Xakamaynta cayayaanka

Baranbarada, injirta, iyo cayayaanka kale ayaa mararka qaar soo geli kara gurigaaga. Way adag tahay in la xakameeyo meelaha qashinku buuxo ama cakiran. Si lamid ah magaalooyin badan oo ku yaala North America, kutaanta ayaa caqabad ku ah Toronto. Qaabka keliya ee lagu xakamayn karo waa in la daweeyo guryaha cayayaanku galay isla markaba. Ayadoo ku xiran cayayaanka, gurigaga ayaa u baahan wax ka badan hal daawayn. Waxaan sidoo kale daawayn karnaa guryaha u dhowdhow.

U soo sheeg cayayaanka kormeeraha gurigaaga isla markaba ama wac Xarunta Adeegga Macaamiisha. Waxaad heli doontaa sida aad ugu diyaar garoobayso gurigaaga daawaynta.

Ma jiro qarash kaaga baxaaya xakamaynta cayayaanka, ilaa inaad ku fashilanto maahee inaad diyaariso gurigaaga ama inaad diido in qandaraasluhu soo galo. Waxaad heli doontaa tilmaamo ku aadan sida aad ugu diyaarinayso gurigaaga daawaynta. Haddii aad naafo tahay, waxaad ka codsan kartaa TCHC inay kaa caawiso diyaarinta gurigaaga.

Halkaan waxaad ka helaysaa qaar kamid ah qaababka aad nooga caawin karto xakamaynta cayayaanka gurigaaga:

- Nadiifi oo qashinka ka saar gurigaaga.
- Ha quudin qoolayda, shinbiraha ama xayawaannada duurka. Waxay soo jiidan karana cayayaanka kale.
- Ha soo qaadan alaabta guriga ee dadka kale iska tuureen. Waxaa ku jiri kara cayayaan.
- Ha dhigin qashinka meelaha la maro ama dhulka qolalka qashinka. Ku rid qashinka haanta qashinka oo xaqiiji inaad xirto afka haanta qashinka si buuxda.

- Agabka waawayn ee aan geli karin haanta qashinka waa in la geeyaa aaga qashinka waawayn.
- Haddii aad tuurto alaabta guriga ama joodarida kutaanta leh, ku duub bac kahor inta aadan ka bixin gurigaaga. Marna alaabtaan ka dhigin meelaha la maro. Waxaad ka codsan kartaa kormeerahaaga guud bacaha joodarida lagu duubo si aad qaab amaan ah ugu duubto alaabtaada.

Kireysteyaashu ma diidi karaan daawaynta xakamaynta cayayaanka.

Xayawaannada rabaayada ah

Waan ognahay muhiimada uu kuu leeyahay xayawaankaaga rabaayada. Waxaan siinaynaa bii'o ku haboon xayawaanka rabaayada ah. Sharciyada magaallada Toronto ayaa xadidaadaya tirada xayawaannada rabaayada ah ee aad haysan karto:

- lama ogola in ka badan sadex eey qoys kasta
- lama ogola wax ka badan lix xabo oo isku darka eeyada, biisadaha, ferrets, iyo jirarka markiiba inay joogaan gurigaaga. Xayawaannada adeeggu maaha xayawaan rabaayad ah, laakiin waxay ku jiraan tirada xayawaannada loo ogol yahay gurigaaga.

Adiga ayaa masuul ka ah habdhaqanka xayawaankaaga rabaayada ah. Adiga ayaa masuul ka ah habdhaqanka xayawaan kasta. Tan waxaa ku jira qaylada xad dhaafka ee ay sameeyaan xayawaanka rabaayada ah, iyo sidoo kale nadiifinta qashinka xayawaanka rabaayada ah.

Raac xeerarkan:

- Xayawaannada rabaayada ah ayaa u baahan in xarig lagu wado goobaha guud. Tusaale, xayawaankaaga rabaayada ah waa in lagu xiraa xarig marka aad ka baxdo gurigaaga iyo marka aad banaanka aado.
- Xaqiiji in aan xayawaankaagu waxyeelo u gaysan hantida ama alaabta dadka kale.
- Ha u ogolaan xayawaankaaga rabaayada inuu qaribo ama abuurro fawdo.
- Marna xayawaankaaga oo keligiis ah ha uga tagin balakoonka.
- Xaaq, abuuri, oo bac ku gur qashinka xayawaankaaga rabaayada ah

markasta.

- Adeegso qasacyada qashinka ee banaanka si aad ugu rido qashinka marka aad soo wareejinayso xayawaanka rabaayda ah.
- Haku ridin saxarada biisada musqusha.
- Haddii aad ku ridayso haanta qashinka, labo bacood ku xir dhammaan qashinka xayawaanka rabaayada ah. Tan waxaa ku jira qashinka biirada iyo xashinka buulka shinbiraha.

Hubi haddii aad u baahan tahay ruqsada xayawaankaaga rabaayda ah. Ka wac magaallada Toronto lambarka **416-338-7387** ama booqo toronto.ca/animal_services/licensing.htm. Waxaad sidoo kale ka ogaan kartaa Magaallada xeerarka kale ee xayawaanka rabaayada ah.

Cabashooyinka ku saabsan xayawaanka rabaayada ah

Waxaad ka caban kartaa xayawaan rabaayad ah, sida eeyga dariska oo qaylinaaya markasta ama dariska oo aan marna uruurin qashinka eeygooda. Haddii cabashadu qusayso arin ka dhacaysa guri gudihiiis, la xiriir shaqaalaha Toronto Community Housing.

Haddii cabashadu la xiriirto cilad ka jirta aagaga guud ama banaanka, la xiriir Adeegyada Xayawaanka oo aad ka helayso **416-338-7297** ama animalservices@toronto.ca.

Taleefanka, fiilada iyo interneedka

Taleefanka, fiilada iyo interneedka ayaan ku jirin kiradaada. Waxaad dooran kartaa shirkadaha aad doonto si ay kuugu siiyaan adeegyadaan gudaha Toronto.

Balan ka qabso shirkada taleefanka ama fiilada inta lagu jiro saacadaha shaqada laga bilaabo Isniinta ilaa Jimcada. Arintaan ayaa loo samaynayaa si kormeerahaaga guud uu u yimaado haddii ay jirto arin farsamo oo u baahan gelitaanka aaga xiran ee dhismaha.

Haddii aad ku nooshahay guri leh nidaamka fiilooyinka taleefanka aadna ogaato inuusan shaqeynayn, u sheeg kormeeraha guud ama la xiriir Xarunta Adeegga Macaamiisha. Waxay hubin doonaan in lambarka taleefankaagu si sax ah u diiwaan gashan yahay aadna awoodno inaad ku xirto nidaamka taleefanka.

Dayactirada iyo ilaalinta

Wac Xarunta Adeegga Macaamiisha **416-981-5500** isla markaba marka dayactir loo baahan yahay. Haddii aad sugto, dhibaataada ayaa kasii dari karta. Mararka qaar, haddii aad muddo dheer sugto, waxaa lagaa qaadi karaa qayb ama dhammaan qarashka dayactirka.

Si aad u codsato dayactirka joogtada ah:

Ka wac Xarunta Adeegga Macaamiisha lambarka **416-981-5500** or email help@torontohousing.ca. Waxaan ka jawaabi doonaa codsiyada dayactirka aan degdega ahayn iyo sugista **shan maalmood oo kuwa shaqada ah gudahood**. Waxaan kaala shaqeyn doonaa helitaanka xal waara.

Shaqaalaha ayaa ku siin doona lambarka tixraaca. Xaqiiji inaad codsato lambarka tixraaca haddii aadan helin. U adeegso lambarkaan haddii aad u baahan tahay inaad dabagal ku samayso codsigaaga.

Dayactirada xaalada degdega ah:

Ka wac Xarunta Adeegga Macaamiisha **416-981-5500**. Xubin kamid ah shaqaalaha ama qandaraasle ayaa imaan doona gurigaaga **afar saacadood gudahood**. Waxaan iskudayi doonaa inaan xalino isla markaba. Haddii aan xalin karin, waxaan iskudayi doonaa inaan samayno dayactir ku meel gaar ah si aan uga joojino inay kasii darto.

Haddii dayactirku yahay mid ku meel gaar ah, shaqaalaha ama adeeg bixiyaha ayaa soo laaban doona **shan maalmood gudahood** si uu u sameeyo dayactir abadiyan ah.

Haddii aad naafo tahay, kudar qaybtaan kamid ah codsigaaga. Ayadoo ku xiran xaalada, waxaan u baahan karnaa inaan muhiimada siino ama ku jawaabno qaab kale.

Saxuunta sataleydka

Waa inaad ogolaansho qoran ka heshaa Xafiiska Gobalka kahor inta aadan rakiban saxanka satalaydka. Xirfadle la aqoonsan yahay sababo la xiriira badqabka waa inuu sameeyaa rakibaada waana inaad keentaa cadeynta in saxankaaga satalaydka la rakibay.

Haddii aad rakibato saxankaaga sataleydka adoon haysan ogolaansho qoran, waxaa lagaa qaadi doonaa qarashka in meesha laga saaro iyo dayactiro kasta oo loo baahdo.

Fadlan ogoow: haddii aad rakibato saxankaaga satalaydka, waa inaad caymis u haysato gurigaaga. Xog ku saabsan caymiska ayaa laga heli karaa **bogga 36**.

Sigaar ku cabida gurigaaga

Haddii aad gurigaaga sigaar ku cabto, xiro albaabada si uusan qiiqu u gaarin aaga la maro. Haddii aad sigaar ku cabto balakoonka, hubi dariska si u xaqiijiso inaan dhibaato ka soo gaarin sigaarka aad cabayso. Marna haka tuurin haashka sigaarka balakoonka. Tani waa khatar dabeed oo aad u wayn. Sidoo kale waxaa lagugu ganaaxi samaynta arintaas.

Bil kasta, shaqaalaha Toronto Community Housing ayaa tijaabiya ganbaleellada dab damiska iyo nidaamyada kale ee badqabka nolosha ee ku xiran aagaga guud ee dhismaha.

Adeegyada guriga

- Iskuduwaha Adeegga Kireystaha ayaa kuu sheegi doona adeegyada guriga ee ay tahay inaad si toos ah u bixiso iyo kuwa ku jira kiradaada.
- Haddii aad bixiso kiro ku saleysan dakhliga, cadadka aad ku bixiso adeegyada guriga ayaa kala duwanaan doonta ayadoo ku xiran xajmiga gurigaaga. Xog dheeri ah oo ku saabsan sida cadadka loo xisaabsho ayaad ka helaysaa qaybta 51 ee *Sharciga Adeegyada Guriyaynta*, iyo sidoo kale tilmaamaha kirada ku saleysan dakhliga ee Magaallada Toronto.
- Haddii aad masuul ka tahay bixinta korontada, ka wac Toronto Hydro

lambarka **416-542-8000** ama booqo torontohydro.com si aad furato ciwaankaaga kahor inta aadan soo guurin.

Haddii aad masuul ka tahay bixinta gaaska, wac Enbridge Gas **1-888-427-8888** ama booqo Enbridgegas.com si aad u furato ciwaankaaga kahor inta aadan soo guurin.

Aagaga guud

Aagag guud waa meelaha danta guud ee dhismaha Toronto Community Housing. Meelahaan waxaa ku jira ganjeellada, luuqyada, marinnada lagu socdo, jaran-jarooyinka, geerashyada baakinka, qolalka dhar dhaqaalka, qolalka qashinka iyo dib u warshadeynta, qolalka bulshada, qolalka dalxiiska, qolalka farshaxanka, qolalka cibaadada, jiimamka, maktabadaha, iyo qolalka kulanka.

Lama ogola in sigaar lagu cabo aagaga guud ama meelaha u dhow dhismahaaga

Gudah ontario, waa sharci daro in sigaar lagu cabo goobaha danta guud ee dhismeyaasha dabaqa ah. Haddii adiga ama qof qoyskaaga kamid ah lagu arko asagoo sigaar ku cabaaya aaga danta guud, waxaad waajihi kartaa ganaac dhan \$5,000 oo kaaga yimaada Magaalada Toronto.

Waa sharci daro gudaha Toronto inaad sigaar ku cabto meel sagaal mitir (ama 30 fiid) uga dhow albaabka ama meesha laga baxo dhisme dadwayne. Goobaha waxaa ku jira dhismeyaasha iyo xafiisyada iyo dhismeyaasha Toronto Community Housing. Sagaal mitir waa dheerarka bas yar.

Waxyaabaha carfoon

Ka fikir dariskaaga marka aad aad hawada wadaagaysaan. Maadooyinka sida jeelka timaha, saabuunta, iyo gareenka waxaa ku jira kiimikooyin iyo carfisooyin dadka kale ku jiran karaan. Marna ha adeegsan buufinta sunta ah ama budooyinka aagaga danta guud. Fadlan iskuday inaad adeegsato alaabaha “bilaa carfisada ah”.

Qolalka dhar dhaqaalka

Inta badan dhismeyaasha Toronto Community Housing waxay leeyihiin qolalka dhar dhaqaalka oo leh dhar dhaqeyaal ku shaqeyya lacagta shilimaadka ah ama kaarka iyo qalajiyaal. Saacadaha iyo qiimeyaasha ayaa ku qoran qol kasta oo dhar dhaqaalka ah. Haddii mashiinkaagu uusan si saxa u shaqeynayn, wac lambarka ku qoran qolka dhar dhaqaalka.

Goobta aan la daganayn

Goobta aan la daganayn oo ku dhex taalla dhismaha Toronto Community Housing waxaa ku jira aaga guud, aaga bulshada iyo aaga dalxiiska (sida maktabadaha, qolalka nasiinada iyo qolalka kulanka). Kireysteyaasha iyo kooxaha uu hogaansho kireystuhu ayaa codsan kara adeegsiga aaga aan la daganayn si ay ugu qabsadaan kulanno halmar ah ama joogto ah.

- **Munaasabad gaar loo leeyahay**

Munaasabadaha gaarka loo leeyahay kuwaasoo aan u furnayn dhammaan kireysteyaasha, sida xafladaha dhalashada ama aroosyada. Qarash ayaa lagaa qaadi karaa caymis ayaana lagu shardin karaa.

- **Munaasabada bulshada**

Munaasabadaha bulshada waa munaasabado u furan dadka kireysteyaasha ah oo dhan, ayadoo ujeedada munaasabadu tahay in la taageero kireysteyaasha ama in laga qaybgeliyo munaasabadaha. Kireysteyaasha iyo kooxaha ay hogaamiyaan kireysteyaashu ayaa u qalmi kara daboolista caymiska Toronto Community Housing.

Si aad u ogaato sida aad u codsan karto adeegsiga goobta aan la daganayn, booqo torontohousing.ca/current-tenants/book-common-space ama la xiriir Xarunta Adeegga Kireystaha.

Meelaa la maro

Dhammaan meelaha la maro ee dhismeyaasha Toronto Community Housing waa in aan la dhigin alaabta guriga, iskuutarada, saladaha dukaamaysiga, baaskiillada, taroollada, agabka lagu socdo ama alaabaha aad doonayso inaad qashinka ku rido. Meelaa la maro waa inaan la dhigin roogaga marka laga

reebo kuwa ay meesha ku dhajisay Toronto Community Housing. Ku rig qashinka guriga iyo agabka qashinka ee waawayn meelaha loogu talo galay ee gurigaaga.

Waxay kasoo horjeedaa xeerka Dabka inaad wax dhigto aaga la maro, ayna ku jiraan caga saaraha iyo raadka buudka. Xeerka Dabka ayaan ogolaanayn in agab la suro banaanka albaabbada dhismaha, ubaxyada, sharaxaada albaabka, iyo waxyaabo kale. Shaqaalaha goobta ayaa agabkaan meesha ka saari kara.

Haddii aad qabto su'aalo ku saabsan qaabka iyo meesha aad ku tuurayso alaabaha waawayn ee guriga ama agabka, waydii kormeerahaaga guud ama wac Xarunta Adeegga Macaamiisha.

Goobaha banaanka

Kireysteyaasha ayaa lagu soo dhawaynayaan inay wadaagaan ayna ku baashaalaan goobaha banaanka ee bushadooda qaab masuuliyad leh, badqab leh kaasoo ixtiraamaaya xuquuqaha dadka kale. Waa inaad sidoo kale qadarisaa xeerarka qaylada.

Haddii aad dooneyso inaad munaasabad ku qabato aaga banaanka ee danta guud, waa inaad ogolaansho ka heshaa shaqaalaha. Si aad u codsato, la xiriir Iskuduwaha Adeegga Bulshada ama Xarunta Adeegga Kireystaha.

Haddii aad qorsheysato cuntada solayga ee banaanka lagu karsho, waxaad u baahan tahay inaad codsato ogolaansho. Waxaad booqan kartaa torontohousing.ca/current-tenants/book-common-space si aad ARAGTO Xeerka Isticmaalka Aaga Danta Guud ee Toronto Community Housing,

Haddii aad ka walaacsan tahay in munaasabad ay ka socoto aag guud adiga oo aan ogolaansho lagaa qaadan, wac Waaxda Badqabka Bulshada oo aad ka wacayso **416-921-2323**.

Dhinacyada banaan

Haddii gurigaagu leeyahay fagaaga danbe, waa lagugu soo dhawaynayaa xafladaha gaarka loo leeyahay. Waxaad masuul ka tahay ficillada martidaada iyo dadka ku soo booqda. Waa inaad ka bixin aaga fagaaga danbe aadna ixtiraamto dariskaaga. Taas ka ayaa ka dhigan inaad iska yareyso qaylada iyo qashinka.

Barkadaha banaanka ee baashaalka iyo dabaasha

Haddii aad qabanayso barkada banaanka taasoo 24 inji hoos u qodan, ama kasii qoto dheer, waa inaad xirtaa aaga dabaasha. Arintaan waxaa amraaya sharciga Magaalada Toronto. Waxay qabanaysaa barkadaha la buufiyo ama dhulka la dhigo ee dabaasha. Si aad u hesho xog dheeri ah, wac **3-1-1**.

Si loo ilaaliyo badqabka ilmaha, qof wayn waa inuu la joogaa markasta marka barkada dabaashu buuxdo, la isticmaalaayo iyo marka biyaha laga shubaayo.

Goobaha baakinka

Si aad u kireysato goob baakin, booqo Xaruntaada Adeegga Kireystaha oo diiwaan gasho ogolaanshaha baakinka. Tan waxaa ku jira aagaga helitaanka baakinka.

Si aad ugu qalanto baakinka kireystaha:

- Qoyskaagu waa inuu sumcada kirada oo wanaagsan ku leeyahay Toronto Community Housing.
- Mulkiyada gaariga waa inuu u diiwaan gashan yahay qofka guriga dagan oo ku qoran heshiiska kirada. Ciwaankiisu waa inuu yahay guri kamid ah guryaha Toronto Community Housing ee qofka qoyska kamid ah ku nool yahay.
- Waa inaad leedahay taargada gaariga oo sax ah iyo caymis.

Xubinta qoyska ee leh gaariga waa inuu:

- Akhriyaa uuna ku dhaqmaa Shuruudaha iyo Xeerarka Baakinka Gaariga Kireystaha.

- Waa inuu buuxshaa uuna saxiixaa Foomka Diiwaan Gelinta Baakinka Gaariga Kireystaha.
- Waa inuu keenaa cadeynta mulkiyada gaariga iyo caymiska marka uu diiwaan gelinaayo.

Goobaha baakinka waxaa la dhigi karaa gaariyaasha. Haku kaydin agabka sida baaskiillada, taayirada, qasacyada gaaska, iyo kuwo kale.

Baakinka dadka martida ah

Baakinka martida ayaa la siin karaa qof kasta oo booqanaaya gurigaaga ama kireysteyaasha booqanaaya dhismaha Toronto Community Housing ee aysan baakin ku lahayn. Waxaa jira labo nooc oo aagaga baakinka martida ah:

- Goobaha bixinta qarashka iyo bandhiga: Martida ku baakinta aagaan waa inay iibsadaan tigidhka lacag bixinta iyo soo bandhigista waxayna raacaan tilmaamaha muuqda.
- Goobaha baakinka aan lacag la bixin ee bandhiga: Martida ku baakinta aagagaan waa inay soo bandhigaan ogolaanshaha Baakinka Martida oo la buuxshay. Waa inay ku dhaqmaan tilmaamaha ku qoran dhabarka danbe ee ogolaanshaha ayna raacaan calaamadaha ku qoran aaga baakinka.

La hadal kormeerahaaga guud si aad u ogaato haddii dhismahaagu leeyahay baakinka martida. Waxaad kadibna codsan kartaa Ogolaanshaha Baakinka Martida oo aad ka helayso Xaruntaada Adeegga Kireystaha ama kormeeraha guud. Qofka guriga dagan ayaa u qalma sagaal ogolaanshiyaasha baakinka martida ah bil kasta.

Waxaad xog badan ka ogaan kartaa baakinka adoo booqanaaya torontohousing.ca/parking.

Jebinta sharciyada baakinka

Si aad u soo sheegto jebinta sharciyada baakinka, kawac Waaxda Badqabka Bulshada **416-921-2323**.

Saraakiisha Ilaalinta Baakinka ayaa ku wareegaaya aaga baakinka awoodna u leh inay baxshaan tigidhada ganaaxa ayna jiidaan gaariyaasha sharci darada u baakiman.

Haddii aad haysato tigidhka baakinka, akhri tilmaamaha ku saabsan lacagta ganaaca oo ku qoran dhabarka tigidhka.

Kiradaada

Bokiska wicitaaka:

Eeg xaalada canshuurta dhismahaaga

Wakaalada Dakhliga ee Canada ayaa kula talinaysa canshuur bixiyaasha inaysan ku darin kirada ay siiyaan guriga ay dagan yihiin ee aan laga qaadayn canshuurta guriga, marka ay codsanayaan Gunnada Ontario Trillium.

Qaar kamid ah dhismeyaasha TCHC ayaa laga reebay waxbarashada magaallada iyo canshuuraha guryaha. Kireysteyaasha dhismeyaashaan ayaan u qalmin Canshuur Dhaafka Guriga iyo Tamarta ee Ontario (OEPTC).

Waxaad ka eegi kartaa xaalada canshuurta dhismahaaga oonlaynka barta torontohousing.ca/taxexempt ama inaad la xiriirto Xarunta Adeegga Macaamiisha **416-981-5500**.

Noocyada kirada

Kirada Ku Saleysan Dakhliga (RGI)

Kani waa kiro lagu baxsho guryaha kaalmada la siiyo. Haddii aad u qalanto bixinta kiro ku saleysan dakhligaaga, cadadka ayaa caadiyan ah 30 boqolkiiba dakhliga Xaasilka ee Qoyskaagu bishii helo. Tan waxaa lagu jaan-gooyay ayadoo la adeegsanaayo canshuur celintaada sanadlaha ah.

Haddii qaar ama dhammaan dakhliga aad ka hesho Ontario Works (OW) ama Barnaamijka Taageerada Naafada ee Ontario (ODSP), kiradaada waxaa lagu jaan-gooyay si waafaqsan qiimaha ay dejisay dawlada Ontario.

Kiradaada guud waxaa sidoo kale ku jira qarashaadka baakinka ama adeegyada guriga.

Kirada qiimaha jaban

Kirada noocan ah waxaa lagu saleeyay heer ku siman ama ka hooseeya qiimaha suuqa. Si aad ugu qalanto, dakhliga guud ee qoyskaaga soo gala ayaan ka badnaan karin afar jeer kirada sanadkii ee gurigaaga ee aad codsanayso.

Kirada suuqa

Kirada Suuqa waa kirada guriga la dagan yahay oo aan loo aqoonsan Kirada La Kaalmeeyo ama Kirada qiimaha jaban oo hoos tagya barnaamijka guriyaynta qiimaha jaban. Kirooyinka suuqa ayaa caadiyan lagu dejiyay sida ku cad qiimaha celceliska ah ee Magaalada Toronto Canada Mortgage and Housing Corporation. Way kordhaan sanad kasta, ayadoo waafaqsan Tilmaamaha Kororka Kirada ee ee Dawlada Ontario.

Codsashada guryaha qiimaha jaban

Haddii aad bixiso kirada qiimaha suuqa aadna doonayso inaad codsato kiro ku saleysan dakhliga, oonlaynka ka codso adoo raadinaaya MyAccessToHousingTO. Waxaad sidoo kale codsan kartaa si toos ah adoo tagaaya Access to Housing Resource Centre, 176 Elm Street gudaha Toronto. Haddii aad haysato codsi wali furan, waxaad la xiriiri kartaa xarunta Taageerada Codsiga **416-338-8888**.

Fadlan ogoow: Waxaa jira liiska sugitaanka ee guryaha la kaalmeeyo. Waxay qaadan kartaa dhawr sano kahor inta aan lagu siin kaalmada kirada ku saleysan dakhliga.

Dookhyada Lacag bixinta

Kireysteyaasha ayaa kiradooda ku bixin kara dhawr qaab.

Lacagta horey loo ogolaaday (PAP)

Kani waa qaabka ugu fudud ee loo xaqiijiyo in kiradaada markasta lagu baxsho wakhtigeeda. Lacagta kirada horey loo ogolaaday, bangigaaga ayaa lacagtaada kirada kasoo diraaya koontadaada toosna ugu diraaya Toronto Community Housing maalinta koobaad ee bangiga ee bil kasta. Waxaad heli

doontaa foom si aad u degsato lacag bixinta noocaan ah marka aad saxiixayso heshiiskaaga kirada. Haddii aad u baahan tahay foom kale, fadlan booqo Iskuduwaha Adeegga Kireystaha ee Xarunta Adeegga Kireystaha, ama wac Xarunta Adeegga Macaamiisha.

Labadaba bangigaaga iyo Toronto Community Housing ayaa kaa qaadaaya qarashka haddii aysan jirin lacag kugu filan oo ku jira koontadaada maalinta koobaad ee bil kasta.

Lacag bixinta bangiga, shirkada daynta, haayada ama shirkada jeega kaashka

Waxaad bixin kartaa kirada adoo adeegsanaaya jeeg ama qaab elektaroonig ah kana diraaya bangigaaga, shirkada daynta, shirkada kaydka, ama shirkada jeega kaashka.

Lacag bixinta taleefanka ama bangiga oonlaynka

Waxaa suuragal ah inaad kiradaada ku bixiso taleefanka ama bangiga oonlaynka ah. La hadal qof jooga bangigaaga, shirkada daynta ama shirkada kaydka si aad u ogaato qaabka.

Lacag bixinta tooska ah ee Xarunta Adeegyada Kireystaha

Waxaad booqan kartaa Xarunta Adeegyada Kireystaha waxaayna toos u bixin kartaa jeegaaga shaqsiga ah, daynta bangiga, ama kaarka daynta.

Lacag bixinta tooska uga timaada barnaamijyada caawimaada bulshada

Haddii aad qaadato Ontario Works (OW) ama Ontario Disability Support Program (ODSP, Barnaamijka Taageerada Naafada ee Ontario), waxaad toos uga bixin kartaa mid kamid ah barnaamijyadaan. Sii lambarkaaga koontada TCHC una dir shaqaalahaaga kiiska. Waxay degsan karaan lacagaha tooska ah.

Nasoo wac haddii aad isleedahay waxaad gafi kartaa ama kasoo daahi kartaa lacagta kirada

Waxaan doonaynaa inaan kaa caawino inaad gurigaaga sii daganaato. Haddii awoodi waydo lacagta kirada, waxaa lagugu yeelanayaa dayn. Haddii kiradaada lagu saleeyo dakhliga, tani waxay khatar kuu gelinaysaa inaad lumiso luminta lacagtaada kaalmaatiga ah. Waxaan dejin karnaa qorsheyaal

gaar ah si ay kaaga caawiso haddii aad ku jirto isbitaalka ama aad ku jirto xaalad degdeg ah oo gaar ah.

Wac Xarunta Adeegga Macaamiisha si si Iskuduwaha Adeegga Kireystaha ama kooxda Xarunta Adeegga Kireyaha ay u ogaadaan. Waan kula shaqeyn karnaa si aan u abuurno qorshaha dib u bixinta lacagta.

Warbixinta isbadellada ku dhaca gurigaaga ama dakhliga

Magaalada Toronto iyo Gobalka Ontario ayaa dejinaaya xeerarka kaalmooyinka kirada ku saleysan dakhliga.

Sida ku cad xeerarka, cadadkaaga kirada waa in dib u eegis lagu sameeyo sanad kasta. Hase yeeshee, haddii wax kamid ah dhacdooyinka soo socda dhacaan, waa inaad isbadelka ku wargelisaa Toronto Community Housing 30 maalmood gudahood:

- Isbadel rasmi ah oo ku dhaca xubnaha qoyskaaga;
- Xubin qoyska kamid ah uu joojiyo inuu si buuxda u dhigto xarunta waxbarashada oo la aqoonsan yahay;
- Xubin kamid ah qoysku uu bilaabo ama joojiyo qaadashada caawimaada bulshada, sida Ontario Works (OW) ama Ontario Disability Support Program (ODSP);
- Xubin kamid ah qoyska dib u eegis lagu sameeyo canshuurihiisa; iyo
- Xubin kamid ah OW ODSP si abadiyan ah loogu kordhiyo dakhliga kaasoo ka badan xadiga dakhliga aan ahayn kan gunnada.

Haddii aadan soo sheegin isbadelaan, waxaa lagugu xukumi karaa soo celinta kirada ama waxaad lumin kartaa kaalmada kirada ku saleysan dakhliga, ama labadaba. Kiradaada ayaa intaas kadib laga dhigi doonaa kirada heerka suuqa. Haddii aad qabto su'aalo ku saabsan soo sheegista dakhliga ama isbadellada guriga, la hadal Iskuduwaha Adeegga Kireystaha.

Adiga ama qof qoyskaaga kamid ah ma 65 sano jiranayaa sanadkaan?

Marka adiga ama xubin kamid ah qoyskaagu uu gaaro 65 sano, waxaad bilaabi kartaa inaad hesho gunnooyinka sida Kaalmada Waayeelka aa

Caymisyada Beeshinka ee Canada kuwaasoo saamaynaaya dakhliga sanadlaha ah ee qoyskaaga. Tan ayaa saamayn karta kirada aad bixiso sanad kasta. Hawshaan ayaa qaadan karta wakhti marka waxaa lagu talinayaa inaad bilowdo marka aad gaarto 64 sano si aad uga fogaato xiliga kala go'a dakhliga iyo daymaha uruura.

Haddii aad lacagta gunnada beeshinka ka qaadatao wadan kale, waa inaad u soo sheegtaa dakhligaan Toronto Community Housing.

Haddii aad qabto wax su'aalo ah oo ku saabsan Qorshaha Beeshinka Canada ama Kaalmada Waayeelka, xogta ayaa laga heli karaa canada.ca/en/services/benefits/publicpensions/cpp.html.

Sida loogu daro qof ama looga saaro qof qoyska kiradaada ku saleysan dakhliga

Haddii uu qof u soo guuro ama ka guuro gurigaaga, waa inaad u sheegtaa Toronto Community Housing 30 maalmood gudahood. Haddii qof ku nool gurigaaga uu dhalo ilmo, waad sugi kartaa si aad isbadelkaan u soo sheegto ilaa dib u eegista xigta ee kiradaada.

Si aad qof ugu darto gurigaaga:

1. Buuxi Foomka Codsiga Kororka Xubnaha Qoyska. Waxaad nuqul oonlayn ah ka helaysaa torontohousing.ca, adoo booqanaaya Xarunta Adeegga Kireystaha ama wacaaya Xarunta Adeegga Macaamiisha.
2. Soo raaci dhammaan dukumiintiyada taageeraaya.
3. U dir ama xogta u keen Xaruntaada Adeegga Kireystaha.

Haddii codsigaaga la aqbalo:

- Waxaad u baahan kartaa inaad saxiixdo Heshiis Kiro oo cusub.
- Kiradaada ayaa dib loo xisaabin doonaa ayadoo lagu saleynaayo dakhligaaga cusub ee qoyska.
- Haddii qof lagu daray qoyskaaga ama uu ku iray liiska sugitaanka nidaamka dhexe ee Magaallada Toronto ee guryaha dawlada, waa laga saari doonaa liiska.

Xaaladaha gaar waa in la daboolaa kahor inta aan qof kale lagu darin qoyskaaga. Waxaa ku jira:

- Qofku waa inuu u qalmaa kaalmada kirada u saleysan dakhliga.
- Ku darista qofku waa inay buuxisaa heerarka shaqada ee Magaallada Toronto (sida ku cad qaybta Heerarka Xeerka Hantida Magaallada Toronto).
- Koontadaadu waa inay sumcad wanaagsan leedahay.

Waa inaad la xiriirtaa Iskuduwaha Adeegga Kireystaha 30 maalmood gudahood marka qof uu ka guuro gurigaaga. Haddii qofku ku jiray heshiiskaaga kirada, waa inuu qoraal ku sheegaa inuu iskaga baxay mid kasta iyo dhammaan danaha uga jiray guriga. Waxaad u baahan kartaa inaad saxiixdo Heshiis Kiro oo cusub.

Dib u eegista kirada ee sanadlaha ah

Haddii aad bixiso kirada ku saleysan dakhliga, waxaan kuu soo diri doonaa baakada dib u eegista kirada ee sanadlaha ah. Baakada waxaa ku jira foomamka ay qasab tahay inaad buuxiso si aad u soo sheegto dakhliga qof kasta oo qoyskaaga kamid ah. Waa inaad buuxisaa aadna ku soo celisaa foomamkaan 30 maalmood gudahood. Haddii aadan sidaas samayn, waxaad lumin kartaa kaalmadaada kirada ku saleysan dakhliga.

Booqo Xarunta Adeegga Kireystaha ama wac Xarunta Adeegga Macaamiisha si aad balan u qabsato haddii aad u baahan tahay in lagaa caawiyo buuxinta foomamkaan.

Sida loo codsado u wareegista guri kale

Kireysteyaasha doonaaya inay u wareegaan guri kale oo ah Kirada Ku Saleysan Dakhliga (RGI) ayaa u baahan inay iska diiwaan gashaan Liiska Sugitaanka Nidaamka Dhexe ee Magaallada Toronto, oo ay maamulaan kooxda Access to Housing. Waxaad toos ula xiriiri kartaa Access to Housing **416-338-8888** ama waxaad oonlaynka uga codsan kartaa myaccesstohousingto.ca/ si aad ciwaan u furato.

Xeerka martida iyo booqdaha

Booqduhu waa qof kasta oo gurigaaga joogaaya kaasoo aan ahayn xubin la ogolaaday oo qoyskaaga kamid ah. Haddii aad tahay kiraytaha RGI, booqdahaaga ayaa kula joogi kara ugu badnaan 30 maalmood sanad gudihiis. Tan ayaa noqon karta 30 maalmood oo xiriir ah ama 30 maalmood oo sanadka dhexdiisa ah, hadba kii badan. Tan ayaan qusayn kireysteyaasha qiimaha kirada Suuqa iska baxsha.

Haddii aad tahay kireystaha RGI uuna qof kula joogaayo wax ka badan 30 maalmood, waxaa loo aqoonsan karaa xubin kamid ah qoyskaaga. Arintaas ayaa saamayn karta kiradaada. Haddii uu jiro kiis gaar ah aadna u baahan tahay in qof marti ah uu joogo muddo ka dheer 30 maalmood, waa inaad ogolaansho ka heshaa Kormeeraha Maamulka Kirada ee gobalkaaga. Bilaa ogolaansho, waxaad khatar ugu jiri kartaa luminta kaalmadaada kirada ku saleysan dakhliga.

Si aad xog badan uga ogaato kiisaska gaarka ah ama aad u hesho nuqulka Xeerka martida iyo booqdaha:

- Wac Xarunta Adeegga Macaamiisha, ama
- Booqo Xarunta Adeegga Kireystaha, ama
- Booqo barta oonlaynka ah torontohousing.ca.

Ka maqnaanshaha 90 Maalmood ama ka badan gurigaaga adoo bixinaaya kirada dakhliga ku saleysan

Qoysaska bixinaaya kirada lagu saleeyay dakhliga gudaha Toronto, tirada ugu badan ee maalmaha dhammaan xubnaha qoysku ay "maqnaan" karaan ama aysan joogin guriga ayagoo wali helaaya kaalmada kirada dakhliga u saleysan waa 90 maalmood. Hase yeeshee, waxaa jira shardi dhaafyo ku xiran xeerkaan.

- Xeerkaan keliya wuxuu quseeyaa haddii dhammaan xubnaha qoyskaagu ay wada maqan yihiin iskumar.
- Maqnaanshiyaasha mudada kooban oo todobo maalmood ah oo xiriir ah ama kayar ayaan lagu tirinayn xadiga 90 maalmood ah ee 12 ka bilood gudahood.

Fadlan noo sheeg haddii aad ku jirto isbitaal, baxnaanin, xabsi, aad sugayso dacwad ama aad haysato cadeyn muujinaysa sabab kale oo sax ah oo aad uga maqnayd gurigaaga muddo ka badan 90 maalmood.

Si aad u ogaato xog dheeri ah, wac Xarunta Adeegga Macaamiisha ama booqo Xaruntaada Adeegga Kireystaha.

Shaacinta xogta shaqsiga ah

Waxaa jira sharciyo difaacaaya xuquuqdaada sirta. Mulkiileyaasha guryuhu waa inay raacaan xeerarka adag marka ay uruurinayaan, adeegsanayaa ama faafinayaan xogtaada shaqsiga ah.

Haddii aad bixiso kirada ku saleysan dakhliga:

Toronto Community Housing waxaa laga doonayaa inay uruuriso xogta shaqsiga ah ee ku saabsan xubnaha qoyskaaga si ay u go'aamiso haddii aad u qalanto kirada ku saleysan dakhliga ayna u xisaabiso kiradaada.

Toronto Community Housing waxay sidoo kale awood u leedahay inay uruuriso ayna hayso xogta ku saabsan kiradaada iyo kaalmada guriyaynta sida ku cad *Sharciga Guriyaynta, 2011 iyo Sharciga Xoriyada Xogta iyo Difaaca Sirta ee Magaallada, 1990*.

Si aad u hesho xog dheeraad ah oo ku aadan sida aan u uruurino, u adeegsano aana u faafino xogtaada shaqsiga ah, booqo webseedka Toronto Community Housing oo ah torontohousing.ca/inforights.

Haddii aad doonayso in qof uu ka hadlo asagoo wakiil kaa ah heshiiskaaga kirada, waa inaad buuxisaa foomka Ogolaanshaha Shaacinta Xogta si aad noogu ogolaato inaan la wadaagno xogta kiradaada. Waxaad arintaan ku samayn kartaa oonlaynka, si toos ah ama Xaruntaada Kireyataha ama adoo wacaaya Xarunta Adeegga Macaamiisha.

Dhammaan kireysteyaasha TCHC

Haddii aad buuxiso Haddii aad buuxiso Xiriirka xaalada Degdega ah iyo Foomka Xogta Caawimaada Gaarka ah oo qayb ka ah hawsha Aqoonsiga Shaqsiga ah, xogtaan ayaa lagu dari doonaa Qorshaha Badbqabka Dabka dhismahaaga. Keliya shaqaalaha gurmada degdega ah iyo shaqaalaha xarunta TCHC ayaa heli kara xogtaan. Waxaa loo adeegsan doonaa xaaladaha degdega ah keliya, ayna ku jiraan daadgureynta, ama in la xaqiijiyo in adiga xubnaha gurigaagu aad heshaan caawimaada aad u baahan tihin.

Guri ka saarida

Guri ka saarida waxaa laga wadaa in kireyste iyo qoyskiis laga doonaayo inay gurigooda uga guuraan sifo sharci ah.

Toronto Community Housing ayaan doonayn inay guriga ka saarto kireysteyaasheeda. Waa xalka kama danbaysta ah. Xeerarkeena Kahortaga Guri ka saarida ayaa ku qoran baakada aad hesho marka aad saxiixdo heshiiskaaga kirada. Waxaad xeerkaan ka akhrin kartaa barta torontohousing.ca/evictions-for-cause-policy. Waxaad sidoo kale la xiriiri kartaa Xarunta Adeegga Kireystaha si aad u hesho nuqul.

Kahor inta aanaan guriga ka saarin, waxaan kala shaqeynaa kireysteyaasha, taageerooyinka bulshada, iyo wakaaladaha adeegga si aan u xaqiijino in kireysteyaashu guri helaan aana u xaqiijino in lacagta kirada la baxsho.

Sababta kireyste looga saari karo guriga ayaa ku qoran *Sharciga Guryaha Kirada ah*. Qaar kamid ah sababaha kireyste looga saari karo guriga waa haddii:

Aad bixin waydo kirada

Guriga waa lagaa saarayaa haddii:

- aadan bixin kirada.
- aadan bixin kirada oo dhamaystiran.
- aad markasta la soo daahdo kirada (ilaa inaad heshiis gaar ah la gashay maahee Iskuduwaha Adeegga Kireystaha).

Fadlan la xiriir Iskuduwaha Adeegga Kireystaha haddii aadan bixin karin kirada. Waxaan u taagan nahay inaan kaala shaqeyno inaad gurigaaga sii daganaato.

Waxyeellada

Guriga waa lagaa saarayaa haddii:

- waxyeelayso hantida TCHC.
- waxyeelayso gurigaaga ama dhismahaaga.
- waxyeelayso qalabka badqabka nolosha, sida ganbaleellada.

Badqabka

Guriga waa lagaa saarayaa haddii:

- aad khatar geliso badqabka dadka kale.
- aad abuurto khatar halis gelinaysa naftaada, dariska, ama shaqaalaha.

Habdhaqanka

Guriga waa lagaa saarayaa haddii:

- aad u dhaqanto qaab carqalad ku ah baashaalka macquulka ah ee kireysteyaasha kale ama shaqaalaha.
- aad jebiso sharciga dhismaha Toronto Community Housing.

Sidoo kale waa lagaa saarayaa guriga haddii martidaadu u dhaqmaan qaab jebinaaya sharciga ama carqalad ku ah kireysteyaasha kale.

Dadka dagan guriga

Guriga waa lagaa saarayaa haddii:

- aad ogolaato in dad aad u badan ku noolaadaan gurigaaga (jebinta heerarka tirada dadka guriga jooga).
- aad haysato xayawaannada rabaayada oo tiro beel ah.
- aad qaybiso (kireyso) gurigaaga.

Ka saarida

Guriga waa lagaa saarayaa haddii:

- aad dayactiro waawayn samayso iskaa ah ama aad qurxiso gurigaaga adiga oo aan ogolaansho qoran ka helin TCHC.
- aad waxyeelayso ama badesho qaab dhismeedka gurigaaga.

Soo sheegista kirada dakhliga ku saleysan

Guriga waa lagaa saarayaa haddii:

- aadan soo sheegin dakhligaaga buuxa.
- aadan soo sheegin dakhliga buuxa ee qof kasta oo kale oo kula nool adoo bixiya kirada dakhliga ku saleysan.
- aadan soo gudbin dukumiintiyada lagaa rabo Dib u eegista kirada ee sanadlaha ah sida ku cad shardiga RGI.
- aad jebiso shuruudaha heshiiskaaga kirada.
- aad leedahay guri, sida guri kale, laakiin aad ku fashilantay inaad iibiso ama wareejiso mulkiyadiisa lix bilood gudahood.

Bokiska wicitaaka

Xafiiska Gudoomiyaha Sinaanta Guryaha

Xafiiska Gudoomiyaha Sinaanta Guryaha (OCHE) waa xafiiska isla xisaabtanka ee Toronto Community Housing. OCHE wuxuu baxshaa taageerada lagu baxsho maareynta kiiska ee kireyste kasta kaasoo lumiyay masuuliyadiisa ama waajahaaya suuragalnimada in guriga looga saaro bixin la'aanta kirada awgeed. OCHE wuxuu qiimeeyaa adeegsiga Hanaanka Dayn Uruurinta TCHC, Xeerka Kahortaga Guri ka saarida iyo Hanaanka Luminta Kaalmada.

OCHE waa ka madan banaan ahay Toronto Community Housing (Gudoomiyuhu wuxuu ka amar qaataa Gudiga Agaasimeyaasha TCHC). Waxaa haga mabaadii'da sharafta, sinaanta iyo madax banaanida.

Waxaad la xiriiri kartaa Xafiiska Gudoomiyaha Sinaanta Guryaha:

- Taleefanka **416-632-7999**
- limeelka info@oche.ca
- Oonlaynka barta oche.ca

Badqabkaaga

Marka xaalad degdeg ah jirto sida dabka, markasta wac **9-1-1** marka koobaad. Kadibna wac Xarunta Isgaarsiinta Waaxda Badqabka Bulshada oo aad ka helayso **416-921-2323**.

Xaqiiji inaad haysato nuqulka Tasmadeena Badqabka, oo horey loo daabacay 2021. Wuxuu kuu sheegayaa sida aad ugu diyaar garoobayso xaaladaha degdega ah iyo waxa ay aad samayso marka xaalad degdeg ah dhacdo. Tusmadu waxay sidoo kale sharxaysaa waxa Toronto Community Housing ay samaynayso si ay gacan uga gaysato ilaalinta badqabka bulshadeena.

Si aad u hesho nuqulka tasmada badqabka, waxaad:

- Soo degso ama ka daabaco torontohousing.ca/safetyguide.
- Booqo Xarunta Adeegga Kireystaha.
- Kala xiriir Xarunta Adeegga Macaamiisha **416-981-5500**.

Ka qaybgalka bulshadaada

Haddii aad doonayso inaad gacan ka gaysato door ku yeelashada bulshadaada, la xiriir Iskuduwaha Adeegga Bulshada. Waxaad sidoo kale booqan kartaa Xarunta Adeegga Kireystaha ee deegaankaaga ama wici kartaa Xarunta Adeegga Macaamiisha si laguugu xiro shaqaalaha ay qusayso.

Nidaamka Wada shaqaynta Kireystaha

Ma jirtaa arin muhiim kuu ah? Kooxdeena wada shaqaynta Kireystaha ayaa diyaar u ah inay caawiyaan kireysteyaasha doonaaya inay door ka qaataan. Shaqaalaha ayaa sidoo kale diyaarinaaya barnaamijyada iyo munaasabadaha kireysteyaasha arimaha quseeya ee saamaynaaya bulshooyinkooda. [Booqo torontohousing.ca/TES](https://torontohousing.ca/TES) si aad u hesh xog dheeri ah.

Kulannada

Kulannada Gudiga iyo Gudiga Golaha

Waxaa jira sadex boos oo ka banaan kireysteyaasha oo ku biiraaya Gudiga Agaasimeyaasha Toronto Community Housing. Waxay shaqeeyaan muddo xileed labo sano ah. Waxaad xog badan ka ogaan kartaa hawsha Balamaha Magaallada toronto.ca/tchctenant.

Kulannada Gudiga iyo Gudiga Golaha ayaa u furan dadwaynaha. Jadwalka iyo ajandaha ayaa lagu soo daabacaa kalandarka webseedkeena torontohousing.ca/events. Waxaad kulannada ka daawan kartaa oonlaynka. Lifaayada muuqaalka tooska ah ayaa lagu dari doonaa shaacinta kulanka. Kulannada ayaa sidoo kale la soo dhigayaa kanaalka Tooska ah ee YouTube ka ee Gudiga TCHC youtube.com/@tchcboardlive6389.

Ma jiraa wax ku jira ajandaha Gudiga oo muhiim kuu ah? Kireysteyaasha ayaa la hadli kara Gudiga Agaasimeyaasha ayagoo u diraaya qoraal ama dood afka ah. Codsigaaga u dir deputations@torontohousing.ca ama wac **416-981-4286**. Dooda waxaa lagu samayn karaa si toos ah, taleefanka ama barta kulanka oonlaynka ah.

Kulannada bulshada

Shaqaalaha Toronto Community Housing ayaa qaban kara kulanno looga hadlaayo waxyaabaha ka socda bulshadaada. Tan waxaa ku jiri kara walaacyada badqabka, munaasabadaha bulshada, mashaariicda dayactirka, iyo waxyaabo kale. Kulannada waxaa sidoo kale qaban kara kireysteyaasha, loo qaban karaa kireysteyaasha, si looga hadlo arimaha maxaliga ah.

Boorarka qodobada

Inta badan dhismeyaasha Toronto Community Housing ayaa leh hal boorka qodobada ah ama ka badan oo ay ku qoran yihiin wararka iyo xogaha kireysteyaasha. Si joogto ah u eeg boorarka qodobada ee dhismahaaga si aad u ogaato waxa ka socda deegaankaaga.

Qaar kamid ah dhismeyaasha ayaa leh gudiyada xogta casriga ah iyo sidoo kale.

Webseedkeena

Webseedka Toronto Community Housing (torontohousing.ca) ayaad ka helaysaa warar iyo xog ku socoto kireysteyaasha. Waxaad sidoo kale helaysaa xeerar, foomam iyo xogo ku saabsan shaqooyinka maxaliga ah.

Adeegyada iyo taageerooyinka

Waxaad ka wici kartaa ama kala xiriiri kartaa Toronto Community Housing 24 saac maalintii, maalin kasta sanadka lambarka 416-981-5500 ama help@torontohousing.ca.

Aalada TTY (Taleefanka Fariimaha) ayaa ka caawisa dad dhagoolka ah, maqalkoodu culus yahay, ama hadalka naafda ka ah inay adeegsadaan taleefanka. Tasmadaan, lambarada TTY ayaa ku qoran meel kasta oo laga heli karo.

**Waaxda Badqabka Bulshada ee Toronto Community Housing:
Wac 416-921-2323**

- Si aad ugala hadasho arimaha amaanka iyo badqabka
- Si aad u soo sheegto jebinta xeerka baakinka ee dhismaha Toronto Community Housing

Lambarada muhiimka ah

Toronto Hydro: 416-542-8000

Wac si aad u hesho xog ku saabsan koontadaada ama aad u soo sheegto korontada go'day.

Ontario Works: 416-338-8888, Wicitaanka bilaashka ah 1-888-465-4478 (dooro dookha 3), 416-392-2823 TTY

Wac si aad u hesho xog ku saabsan adeegyada bulshada iyo taageerada shaqada ee aagaaga.

Adeegyada Magaallada Toronto: 3-1-1 ama 416-338-0889 TTY

Wac si aad u hesho xog ku saabsan adeegyada ay bixiso Magaalada Toronto. Shaqaalaha ayaa ku hadla luuqado badan.

Toronto Public Health: 3-1-1, 416-338-7600 ama 416-392-0658 TTY

Toronto Public Health ayaa u gudbin doonta wicitaankaaga xirfadlaha caafimaadka si bilaash ah, xogta caafimaadka qarsoodiga ah iyo tallada. Waxaad sidoo kale diiwana gelin kartaa barnaamijyada caafimaadka dadwaynaha sida tababarka cunto kariyaha iyo casharada waalidnimada.

Health Connect Ontario: 8-1-1 ama 1-866-797-0007 TTY

Xaaladaha aan ahayn degdega ah, hel tao caafimaad oo bilaash ah, oo qarsoodi ah aadna ka helayso kalkaaliso diiwana gashan. (Xaalada degdega ah ee caafimaadka, wac 9-1-1.)

Adeegyada Taageerada Daryeelka Guriga iyo Bulshada: 416-314-5518 ama 1-800-387-5559 TTY

Qodobka koobaad ee xogta xiriirka oo ku saabsan daryeelka waayeelka deegaankaaga.

Ruqsada Magaallada iyo Heerarka: 3-1-1 ama 416-338-0889 TTY

Wac si aad u hesho xog ku saabsan heerarka hantida (sida jadwalka ama ku fashilmida samaynta dayactirada muhiimka ah). Waxaad sidoo kale cabasho ak gudbin kartaa jebinta sharciga aagaga guud ama waaxaha.

Xafiiska Xiriiryaha Toronto: 416-392-7062 ama 416-392-7100 TTY

Wac si aad cabasho uga gudbiso dawlada magaallada ama wakaaladaha magaallada, sida Toronto Community Housing. U tag Xiriiryaha **kadib** marka aad iskudayday dhammaan dookhyada kale oo dhan.

Gudiga Mulkiilaha Guriga iyo Kireystaha: 416-645-8080, Wicitaanka bilaashka ah 1-888-332-3234 ama 1-800-855-0511 TTY

Wac si aad u hesho xog ku saabsan Sharciga Guryaha Kirada ah. Sharcigaan ayaa sharxaaya xuquuqaha iyo waajibaadka mulkiileyaasha guryaha iyo kireysteyaasha kireysta guryahooda ku yaala Ontario.

Community Legal Education Ontario (CLEO): 416-408-4420

Wac si aad u hesho xog sharci oo bilaash ah. CLEO ayaan bixin talo sharci, laakiin Legal Aid ayaa bixisa.

Legal Aid Ontario: 1-800-668-8258 ama 416-979-1446

Wac si aad u hesho adeegyada sharciga oo bilaash ah ama qiimo jaban.

Federation of Metro Tenants' Associations: 416-921-9494

Tan waa urur khayri ah oo ka shaqeeya kor u qaadista xuquuqaha kireysteyaasha. Wac si aadu hesho xog ku saabsan xuquuqdaada ka kireyste ahaan.

Lambarada badqabka ee ay tahay inaad haysato

Lambaradaan ayaa wici kartaa 24 saac maalintii, maalin kasta sanadkii.

Muhiim: gacanta ku hay lambaradaan si aad u hesho caawimaada aad u baahan tahay marka aad u baahan tahay.

Adeegyada Xaalada degdega ah: 9-1-1 (TTY iyo fariin qoraalka ayaa la heli karaa).

Mar kasta wac lambarkaan marka xaalad degdeg ah jirto. Wac lambarkaan si aad ula xiriirto Adeegga Booliiska, Toronto, Adeegyada Dab Damiska ee Toronto iyo Adeegyada Gurmada Caafimaadka ee Toronto.

Xarunta Dhexe ee Gurmada Adeegga Booliiska Toronto: 416-808-2222 ama 416-467-0493 TTY

Wac lambarkaan xaladaha aan degdega ahayn. Adeegga Booliiska Toronto ayaa ka shaqeeya waaxo ku kala yaala magaallada. Si aad u ogaato waaxda aad agteeda ku nooshahay, iyo xogtooda xiriirka, booqo torontopolice.on.ca/divisions.

Ciidanka Kahortaga Danbiyada ee Toronto: 416-808-8477 ama 1-800-222-8477, iimeelka crime@222tips.com

Wac lambarkaan haddii aad xog ka hayso danbi si aad ula wadaagto booliiska. Qasab maaha inaad sheegto magacaaga.

Adeegyada Dhibaneyaasha Toronto: 416-808-7066

Wac lambarkaan si aad u hesho taageerada degdega ah ee dhibaneyaasha danbiyada.

Laynka Taageerada Dhibanaha ee Wasaarada Qareenka Guud: 416-314-2447, Wicitaan bilaash ah 1-888-579-2888

Wac si aad u hesho adeegga degdega ah ee goobta ee dhibaneyaasha danbiga. Adeegyada ayaa lagu heli karaa luuqado badan.

Laynka Caawimaada Haweenka La Kufsaday: 1-866-863-0511 ama 1-866-863-7868 TTY

Wac lambarkaan si aad u hesho caawimaada haweenka la kufsaday.

Taageerooyinka masiibada

Kuwaani waa lambarada aad wici karto haddii adiga, ama qof aad taqaano, u baahan yahay caawimaad ku aadan maareynta cilada caafimaadka dhimirka ama balwada. Wac 2-1-1 si aad adeegyo badan uga hesho aagaaga

Laynka Gurmada Haweenka La Kufsaday: 416-863-0511

Children's Aid Society of Toronto: 416-924-4646 ama wicitaanka bilaashka ah 1-866-527-0833

Wuxuu bixiyaa qiimeyno, caawimaada masiibada, talo bixinta iyo adeegyada si looga hortago xadgudubka ilmaha iyo dayacaada.

Xarumaha gurmada ee Great Toronto: 416-408-4357 ama fariin qoraalka 45645

Wuxuu siinayaa taageero dhimir, caawimaada masiibada iyo kahortaga isdilka.

Laynka Gurmada Masiibada ee Gerstein Centre: 416-929-5200

Wuxuu siiyaa caawimaada masiibada dadka waawayn ee waajahaaya dhibaatooyinka caafimaadka dhimirka ee ku nool Toronto.

Adeegyada Taageerada Daryeelka Guriga iyo Bulshada: 416-314-5518 ama 1-800-387-5559 TTY

Saacadaha shaqada: 8:30 a.m. ilaa 5 p.m.

Meesha koobaad ee aad kala xiriirayso xog ku saabsan daryeelka waayeelka. Waxaad ka helaysaa xog ku saabsan noocyada daryeelka ee laga heli karo aagaaga.

Taleefanka Kids Help: 1-800-668-6868

Wuxuu talo siiyaa dadka jira 20 iyo kayar.

Laynka Gurmada Progress Place: 416-960-9276 ama fariin qoraal u dir 647-557-5882

(3 p.m. ilaa saqda dhexe)

Wuxuu taageerada dadka isku xaalada ah siiyaa dadka la nool xanuunka dhimirka.

Kooda Gurmada Masiibada ee Wareegta ee Gobalka ee Scarborough Hospital: 416-495-2891

Wuxuu gurmada caafimaadka dhimirka siiyaa shaqsiyaadka kawayn 16 sano jir. Wuxuu u adeegaa East York iyo Scarborough.

St. Elizabeth Health Care: 905-940-9655

(Xafiiska Dhexe ee Toronto) 1-800-463-1763

(24 saac maalintii, todobo maalmood asbuucii, kana shaqeeya North York iyo Etobicoke)

Wuxuu bixiyaa taageerada caawimaada masiibada ee wareegya iyo taageerooyinka xubnaha qoysaska, dadka kale ee muhiimka ah iyo daryeel bixiyaasha.

Nidaamka Maamulka Isticmaalka Maandooriyaha iyo Joojinta daroogada – Michael Garron Hospital: 1-866-366-9513

Wuxuu siiyaan caawinaad qof kasta oo jira 16 sano ama ka wayn doonaaya adeegyada maaraynta joojinta daroogada ee baxsan caafimaadka gudaha Toronto.

Xarumaha Daawaynta Youthdale: 416-363-9990

Wuxuu adeegyada caafimaadka dhimirka siiyaa carruurta iyo dhalinta (ilaa 16 sano jir) iyo qoysaskooda Toronto.

Xiriirada dhalinta

Waxaan la shaqeynaa iskaashato si aan ugu xirno dhalinta bulshadeena fursadaha dhaqaalaha iyo bulshada, sida ciyaaraha, farshaxanka iyo tacliinta.

Xog badan ka ogoow oonlaynka barta torontohousing.ca ama adoo la hadlaaya shaqaalaha wada shaqaynta kireystaha ee maxaliga ah.

Adeegyada Dhalinta

toronto.ca/youth or call 2-1-1

Barnaamijyada shaqaaleysiinta, fursadaha mutadawacnimada iyo waxyaabo kale.

Iskaashiga Hormarinta Shaqada Dhalinta

eos.toronto.ca/jobsincommunity/go/PAYE/2581717/ or call 416-488-0084

Loogu talo galay dhalinta ku nool xaafadaha muhiimada la saaraayo ee Toronto.

Adeegyada Bulshada ee WoodGreen

woodgreen.org ama wac 416-645-6000

Barnaamijyada dhalinta oo bilaash ah ayaa bixiya baxbaxyada bulshada oo baashaal ah, caawimaada shaqada guriga, iyo caawimaada dhalinta ku cusub Canada oo raadinaaya shaqada.

Faallada aad ka dhiibanayso adeegyada maxaliga ah

U adeegso meesha banaan ee hoose si aad ugu qorto lambarada adeegyada aad ku tiirsan tahay ee xaafadaada. Tusaale, waxaad ku dari kartaa xarunta kuugu dhow ee caafimaadka bulshada, xarunta bilaa balanta la galo ee caafimaadka, kaydka cuntada, iyo kuwo kale. Wac **2-1-1** ama **3-1-1** si aad u hesho xogta adeegyada aad u baahan tahay.

Liiska erayada

Guri ka saarida

Marka kireyste ama qoyskiisa laga doonaayo inay ka baxaan gurigooda qaab sharci ah sabab la xiriirta inaysan buuxin waajibaadkii ku qornaa heshiiskooda kirada ama *Sharciga Guryaha Kirada ah*.

Siliska furaha

Oo sidoo kale la yiraahdo "koorta furaha." Silisyada furaha waxaa loo adeegsadaa in lagu furo albaabbada waawayn ee qaar badan oo kamid ah guryaha Toronto Community Housing. Waa aalad yar, oo caadiyan ka samaysan caag ama bir, taasoo la saaro badhan koronto ah oo u dhow albaabka kaasoo furaaya albaabka.

Qoyska

Dhammaan dadka ku nool gurigaaga. Waa inaad u sheegtaa mulkiilaha gurigaaga qof kasta oo ku nool gurigaaga. Mulkiilaha ayaa leh xeerar ku saabsan ku darista iyo ka saarida dadka gurigaaga.

Sharciga Adeegyada Guriga, 2011 (HSA)

Sharciga maamula guryaha kirada ku saleysan dakhliga (RGI) ee Ontario. Wuxuu badelay *Sharciga Dib U Habaynta Guryaha, 2000*.

Khiyaannada

Khiyaano (sida beenta ama khiyaanida) loogu talo galay in lagu khaldo qof si uu u baxsho dhaqaale ama danno kale una u siiyo qofka khiyaanoolaha ah.

Mulkiilaha guriga

Tusmadaan, mulkiilaha gurigu waa Toronto Community Housing Corporation (TCHC).

Heshiiska kirada

Heshiis u dhexeeya mulkiilaha guriga iyo hal kireyste ama ka badan. Waxay kuu sheegaysaa guriga aad ka kireysanayso mulkiilaha guriga iyo kirada rasmiga ah ee guriga, wuxuuna cadeynayaa xuquuqda iyo waajibaadka mulkiilaha guriga iyo kireysteyaasha. Haddii aad tahay kireystaha, waa inaad la kulantaa shaqaalaha Toronto Community Housing aadna saxiixday

heshiiska kirada. Waa in sidoo kale lagu siiyay nuqulka heshiiska kirada marka aad biloowday kiradaada.

Sharciga Guryaha Kirada ah (RTA)

Sharciga dejinaaya xuquuqaha iyo waajibaadka mulkiileyaasha guryaha iyo kireysteyaasha kireysta guryaha la dagan yahay.

Qaybinta

Qaybintu waa marka kireyste uu guriga ka guuro uuna siiyo qof kale guriga si uu ugu noolaado. Heshiiskaaga kirada ayaan kuu saamaxayn inaad qaybiso gurigaaga.

Kireystaha


Qof saxiixay heshiis kiro ee guri siina wada inuu kusii noolaado guriga. Waxaad haysan kartaa dad ku nool gurigaaga kuwaasoo qayb ka ah gurigaaga laakiin aan ahayn kireysteyaal. Tusaale, carruurta kayar 16 sano ayaan ahayn kireysteyaasha maadaama uusan ogolayn sharcigu inay saxiixaan heshiiska kirada.





Kirada

Xiriirka joogtada ah ee u dhexeeya mulkiilaha guriga iyo kireystaha (ama kireysteyaasha haddii in ka badan hal qof ay saxiixaan heshiiska kirada). Kirada waxaa maamula heshiiska kirada, *Sharciga Guryaha kirada ah* iyo, haddii kirada la kaalmeeyo, *Sharciga Adeegyada Guryaha*.

Guriga:

Tusmadaan, guri waa hooyga aad ka kireysanayso Toronto Community Housing (haddii uu yahay guri dabaq ku yaala ama guri fillo ah.)



-  @TOHousing
-  @torontohousing
-  TorontoCommunityHousing
-  TorontoCommunityHousing

